# TAARIIKH NOLOLEEDKII AABAYAASHII QORISTA FARTA SOOMAALIGA

W/Q: C/nuur C/qaadir Maxamed

**Aabayashii farta Soomaaliga**

Hadii aan qaar kasoo qaadano aabayaashii farta Soomaliga taariiq nololeed koodii waxaa kamid ahaa:

- **Mudane Xuseen Sheikh Axmed (Kadare**):

Marxuum Kadare Alle ha u naxariistee wuxuu ku dhashay Degmadda Warsheekh oo ku taal duleedka magaalada Muqdisho, qiyaastii sanadkii1931. Macalinkii ugu horeeyay ee wax soo baray waxaa uu ahaa Macalin Xuseen Gaab oo Warsheekh caan ka ahaa, waxaa uu Kadare u dhigay Quraanka, halkaasi oo uu ku bartay dhigaalka farta, waxaana meesha uu ka ambo qaaday damaciisa ahaa in uu qoro farta Soomaaliga.

Mudane Marxuum, Xuseen Sheekh Axmed, waxaa uu aabihii geeriyooday isagoo 9 jir ah kadib waxaa uu soo galay magaalada Muqdishu. Alle ha u naxariistee Kadare, wuxuu uu noqday geeridii aabihii kadib Xer diinta barta xili qofkii Iskuul dhigto, la dhihi jiray waa dambaabay. Marxuum kadare, 16 jir markuu ahaa ayuu ku biiray Iskuul Talyaani ah, waxbarashadaas oo la dhihi jiray xiligaasi Seeraale (iskuul habeenkii la dhigto).

Marxuumku, wuxuu soo joogay xili Soomaalida, wax lagu baro luqadaha Ajnabiga (Carabiga iyo Talyaaniga) taas oo keentay in markii uu dugsi sare dhameeyo uu qofku; isla ahaa qof Jaamacad dhameeyay oo kale.

Markii la sameeyay ururkii SYL, waxaa dadkii la baray far uu lahaa



Cismaan Yuusuf Kenediid, fartaas ayaa la sameeyay 1920-kii, farta Keynediid waxaa ay aheyd far isku darsan sida Itoobiyaanka .
Kadare, go'aan ayuu ku gaaray in uu sameeyo far isaga u gaar

ah oo marna la isku daro marna la kala jaro. Marxuum Kadare, wuxuu ku fakiray in uu sameeyo far u dhiganta farta Talyaaniga oo u qoronta, qabka uu maanka ku haayo.
Marxuum Xuseen Sheekh Axmed Kadarre, Alle Naxariistii jano hasiiyee, Fartiisii waxaa loogu magac daray "Farta Kadariya", taasoo muujinaysa in uu isaga fartaas Alifadeeda lahaa.

Xuruufaha ay fartasi ka sameysneyd waxay ahayd mid gaar ah u Aliftay oo isaga kaliya uu yaqaano, taas oo ka duwaneyd farihii xiligaas soo ifbaxay oo badankood ku qornaa Carabi iyo Talyaani.

1952dii Kadare, wuxuu xuruufihii fartii uu alifay ka dhigay xuruufo kale go'aysa iyo kuwo isku darmeysa, iskuulna wuu furay si fartiisa gaarka ah loo barto.

Marxuum Xuseen Kadare, waxaa uu ku guuleystay tartan loo qabtay farihii xiligaas jiray oo afaf kala duwan ahaa, wuxuuna galay kaalintii labaad marka laga reebo fartii laatiinka ahayd ee Dr: shire Jaamac. farahaas waxaa Soomaali ku qornaa Farta Cusmaaniya iyo Karadiya.

Mudane Xuseen Sheekh Axmed (kadare), wuxuu geeriyoodey Axad, 1da bishii Febraayo sanadka 2015, Isbitaal ku yaalo magaalada muqdisho, isagoo da'diisu lagu qiyaasay dhawr iyo sideetan sano (84).

Alle ha u naxariistee Marxuum Xuseen Sheekh Axmed (Kadare), wuxuu ka soo shaqeeyey wasaaraddaha aay ka mid yihiin Wasaaraddii Warfaafinta, Wasaaraddii Hidaha iyo Tacliinta sare iyo Akdeemiyada Fanka iyo Suugaanta.

Marxuum kadare,wuxuu ahaa nin abwaan ah oo hal abuur leh, wuxuu kaloo ku caan ahaa keydinta sugaanta iyo sheekooyinka dhaqanka,waxaa kaluu ahaa Marxuumka wadani Soomaliyeed oo baraxtiran.

- **Mudane Shire Jaamac Axmed**

Marxuum Shire Jaamac Axmed Alle ha unaxariistee, wuxuu ka tirsanaa aabayaashii Farta soomaaliga, wuxuu dhashay Shire Sanadka markuu ahaa 1933dii, wuxuuna ku

dhasha, Magaaladda wardheer ee Cariga Soomaali-galbeed.

Marxuumka wax barashadiisa dugsiga Qur'aanka wuxuu ku qaatay wardheer Dugsiyadiisa hoose ilaa sarena wuxuu ku qaatay dalka gudahiisa. Marxuum Shire jaamac waxbarashadisii sare wuxuu, kusoo qaatay dalalka kala ah Masar (Qaahiro), Ingriiska( London) iyo Ruushka (moosko).

Marxuumka noloshiisii wixii ka dambeeyay sanadkii 1978dii dalka debadiisa, isgoo mudadaasi iyo wixii kadambeeayay ahaa uqeybsanaha arrimaha dhaqanka, Safaaraddaha Soomaaliaya ay ku lahayd magaalooyinka, Qaahira iyo Stockhlom.

Ugu dambeyntii Mudane Shire wuxuu ku noolaa magaaladda Stockhlom ee dalka Swedan; halkaas oo uu ku geeriyooday bilowgii Bishii Janaayo 1999kii.

## I. Waxqabadkii Mudne Marxuum Shire Jaamac Axmed

Marxuum Shire, inta'aan la qorin Farta Soomaaliga, wuxuu qori jiray sheekooyin afsomali ah oo uu ku qori jiray farta laatinka inkastoo sheekooyinkaasi aan fursad u helin in la daabaco. Sheekooyinkaas ,waxaa kamid ahaa sheekadda uu ugu magic daray; "Halgankii nolosha" iyo sheekadda kale ee uu kumagacaabay "Rooxaan". Waxaa kale uu Marxuum shire wax ka qoray Naxwaha Af soomaaliga.

Mudane Shire, wuxuu ka mid ahaa ragii faro ku tiriska ahaa bartamihii qarnigii 20aad wel welka ka muujin jiray qoraal la'aanta afka Soomaaliga.

Farta Af Soomaaliga lagu qoro ee laatiinka ee rasmiga ah ayaa waxaa isku soo duba riday luqad yahanka la yiraahdo, Shire Jaamac Axmed. Shire, oo intii u dhaxeysay sanadihii 1951 ilaa iyo 1954 Jaamacadda Al-Azhar ee dalka Masar kaga baxay barashada luqadda Carabiga iyo sharciga Islaamka, sidoo kalena, sanaddii 1967-kii Jaamacad kale uga baxay dalka Ruushka, ayaa iska lahaa hindisaha farta laatiinka ee maanta uu Af Soomaaliga ku qoran yahay.

In kastoo Marxuum Shire, uu luuqadda Carabiga wax kusoo bartay, bulshada Soomaaliyeedna ay dhaqan ahan u dhowdahay, tan qowmiyadda Carabta ee badankooda muslimka ah; Qur'aanka kariimka ahna uu kusoo degay luqadda Carabiga.

Haddana, Dr.Shire sababta ugu weyn ee uu naftiisa ugu qanciyay una doortay in lagu qoro Af-Soomaaliga farta laatiinka waxay aheyd, ayada oo inta badan makiinadiihii xiligaas wax lagu qori jiray lagu soo naqshadeeyay wax ku qorista farta laatiinka (specific layout for latin alphabet typewriter keys), iyo ayada oo ay u muuqatay in aanay aheyn howl fudud sidii la'isu waafajin lahaa shibaneyaasha xarfaha Carabiga oo ka kooban 28 xarfood oo qaarkood u baahan qaab ugu hadal gaar ah, balse aan ku jirin luqadda Soomaaliga sida:xarfaha ( ز ص, ث, ذ, ض, ظ, غ ).

Waxaa kaloo marxuum Shire, ku dedejinaayay isagoo naftiisa aad uga welwelsaneyd,in hadii aan la qorin afka soomaaliga, Ardayda Soomaaliyeedna aan wax lagu barin, in ummadda soomaliyeed, aay weligeed ku jiri doonto, Gumeysi dhanka maskaxdda ah.

**Farta laatiinka ee uu Marxuun Shire, u doortay in lagu qoro af Soomaaliga iyo sida u qeybsantahay shibane- iyo shaqal:**

Guud ahaan soomaalidda iskama diidaneeyn qoraalka afsomaaliag;

hase yeeshee waxaa laysku maandhaafsanaa farta lagu qoraayo side loo qoraa xarfahee laqaataa, maa Laatiinaa, sida uu Shire jaamac u ololeeynaaya, Xarfaha Carbiga oo uu halganka ugu jiray Mudane Ibraahim xaashi oo ka tirsanaa ragaasi.



Fartii gaarka ahayd ee Mudane Kadare, Fartii Soomaaliga ee uu diyaariyay xarfaheeda Mudane Cusman Kenediid oo isagana ka tirsanaa u halgama yaashee qoraalka farta soomaaliga, iyo far kale oo faro badan oo rag badan ay la soo shirtageen, midda ay noqoneyso?

Ugu dambeyntii hal sano kadib xuriyadii 1960kii, waxaa loo saaray qoraalka farta soomaaliga Gudi ka kooban sagaal(9) xubnood oo kala ahaa;

1. Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal Guddoomiye

2. Yaasiin Cismaan Kenadiid Xubin

3. Maxamuud Saalax (Ladane) Xubin

4. Dr. Ibraahim Xaashi Maxamuud Xubin

5. Khaliif Suudi Xubin

6. Mustafe Sheekh Xasan Xubin

7. Shire Jaamac Axmed Xubin

8. Xuseen Sheekh Axmed (Kaddare) Xubin

9. Yuusuf Meygaag Samatar Xoghayn.

Gudigaani waxay ahaayeen kuwo kala taageersan farihii kala duwanaa loo soo bandhigay in lagu qoro Afsomaaliga.

Dood dheer Kedib, markii uu guddigu dersaad ku sameeyey far kasta wax ay ku fiican tahay iyo waxa ay ku liidato, guddigu waxay soo jeediyeen in farta Shire Jaamac ee "Laatiinka" ee dib-u-habbeynta lagu sameeyey inay tahay "tan ugu wanaagsan"iyo Kaddariya oo iyana noqotey "tan labaad ee ugu wanaagsan".

Inta aan go'aanka la gaadhin waxaa guddigii iska casilay oo ka baxay Ibraahim Xaashi Maxamuud iyo Maxamuud Jaamac Afballax, sababtoo ah ma aysan taageersaneyn in af Soomaaliga farta Laatiinka lagu qoro.

Waxaa booskoodii lagu beddelay rag kale. Sidaas darteed, go'aankii ugu dambeeyey waxaa saxiixay:-

1. Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal Guddoomiye

2. Shire Jaamac Axmed Guddoomiye Ku-xigeen

3. Xuseen Sheekh Axmed Kadare Xoghaynta Farshaxanka

4. Cali Sheekh Axmed Qutbi Xoghaynta Farshaxanka

5. Abuukar Joodaadex Xubin

6. Caddo Sheekh Cali Xubin.

Warbixintii gudiga qoraalka af Soomaaliga ay soo saareeyn 1966kii nuqul kamid ayaa waxaa loo gudbiyay "Hay'adda Qaramadda Midoobay laanteeda waxbarashadda iyo sayniska (UNESCO), waxaay hay'addaasi iyada ku talisay in laqaato farta laatiinka ee uu qabeeyay Dr. Shire Jaamac

Mudane Shire Jaamac, wuxuu ku qanacsanaa farta laatiiniga, arintaasi u ololeynta farta laatiinka Marxuum shire wuxuu kala kulmay dhib badan oo kaga timid sokeeye iyo shisheeyaba xitaa waxaa wax laga sheegay islaamnimadiisa.

Ugu dambeyntii sanadkii 1971, dowladii kacaanka Gudigii AfSoomaaliga ay u magacowday ee uu shariif saalax, Gudoomiyaha ka ahaa; waxaay iyaguna doorteen, Fartii laatiinka ee Dr. Shire is ku habeeyay ee uu lixdameeyadii, u adeegsan jiray wargeyskii, "Iftiinka Aqoonta".. Sanadkii 1973 Mudane Shire; Alle, ha u naxariistee wuxuu Agaasime guud ka noqday Hay'adda Akadeemiyadda Dhaqanka.

## ❖ Tarrikh Noleedkii Aw Jaamac Cumar Ciise

Alle, ha u naxariistee Aw-Jaamac, wuxuu ahaa nin qoraa ah oo qora buugaagta fanka iyo suugaanta, iyo kuwa Taariikhda. Aw-jaamac wuxuu ku dhashay, Baadiyaha Degmada Qandala ee gobolka bari, sanadku markuu ahaa 1922 kii. Aw –Jaamac, wuxuu dhintay 2013 kii, isagoo da'diisu tahay, 91 sano.

Aw- Jaamac isagoo dhalinyaro ah ayuu yimid Magaalada Muqdisho, halkaas uu ka bilaabay barashada Diinta Islaamka, wuxuuna kamid noqday Xertii, Sheekh Nuur Cali Calow oo Tafsiirka quraanka iyo kutubta kale ee diiniga ah, ugu aqrin jiray Masaajidada ku yaala Magaalada Muqdisho.

Sanadkii 1965tii, Aw- Jaamac wuxuu qoray buugii ugu horeeyay oo ka hadlayay Taariikhda Soomalida, wuxuuna buugaasi ahaa mid ku qoran

afka Carabiga, waxaana lagu daabacay magaalada Qaahira ee Xarunta Dalka Masar.

Sanadkii 1972dii, markii la bilaabay qorista farta Somaaliga Aw- Jaamac cumar, wuxuu ahaa ninkii ku bilaabay in diiwaaka suugaanta iyo Taariikhda Soomaalida, ee uu hayay ku qoray Af Soomaali, asagoo kasoo Tarjumay Afka Carabiga.

Sanadkii 1991dii, markuu dhacay bur burkii, dowlada dhexe ee Dalka ayuu Aw- jaamac u guuray Dalka Jabuuti, si uu ugu noolaado inta uga hartay cimrigiisa .

Aw- Jaamac wuxuu halkaasi ku qoray Buug uu kaga hadlaayay Qaran Jabka Somaaliya, kaasoo noqday Buug caan ah. Aw- Jaamac Alle ha u naxariistee wuxuu ku dhintay Dalka Jabuuti.

Aw- jaamac wuxuu ka mid ahaa Odayaashii wax ka qoray Farta Somaaliga wuxuuna kashaqeen jiray Academiyada Fanka iyo Suugaanta ee Soomaaliya.

Talo soo jeedin

Inkastoo aan Qoraalkan ku soo koobi Karin ragii faraha badnaa ee gundhiga u ahaa qoraalka Farta Soomaaliga waxaan halkaa ku soo jeedinayaa:

1- In Dowladu ay usameeso Aabayaashii Qorista Farta Soomaaliga maalin u gaar ah ee lagu xasuusto laguna daro Jadwalka xusaska Taariikhiga ah.
2- In Taariikhdooda laqoro laguna daro Manhajka wax Barashada Dugsiyada Dalka.
3- In loogu magac daro goobaha muhiimka ah ee dalka sida Jidadka, Dakadaha Dalka, Garoomaha Ciyaaraha, Garoomada Diyaaradaha, Dugsiyada IWM.

# HEERKA WASAKHDA XEEBTA CAASIMADDA SOOMAALIYA

## QORE: XASAN CISMAN XASAN

Soomaaliya waa wadan ku yaala geeska AFRIKA, waxay ku taalaa Badda Cas iyo Badweynta Hindiya. Waxay Soomaaliya leedahay xeebta ugu dheer ee qaaradda AFRIKA, Sidoo kale waa dal cimilo wanaagsan, ILAAHNA ku galaday kheyraadka dabiiciga ee Bada iyo Berigga.

Soomaaliya waxay soo martay dagaallo sokeeya, taasoo galisay hakad hormarka: Tacliinta, Caafimaadka, wax soo saarka, iyo dhamaan kaabayaasha nolasha.

Magaalada Muqdisho waa Caasimadda Soomaaliya, waa maagaalada ugu bulshada badan, waana magaalada ugu daran uu burburka saameeyay, xeebta magaaladan waa mid uu ka muuqdo saameeynta burburka baaxad weyn.

Dadka Xamar deggan waxay qashinka ku daadiyaan xeebta,

guud ahaan waxay ka dhigen meel ay geeyaan wasakhda ugu halista badan.

Hadaba Soomaaliya marka ay ka soo toostay jiif dheer, waxay ku baraarugtay dhibaatada daran ee ka muuqata Badda Soomaaliya, waxayna dhidibadda u aasaastay Hey'adda CilmiBaarista Baddaha Soomaaliya 2013, si loo ogaado Cilmi ahaan:-

Heerka waxyeelooyinka xeebaha Soomaaliya loo geystay mudo ka baddan 25sano iyo sida wax looga qaban karo.

2- Inta uu dhan yahay kheyraadka dabiiciga ee nool iyo midka aan nooleen.

3- Sida ugu haboon ee looga faa'ideysan karo kheyraadka badeenna ku jira & kuwa kale oo badan.

4- Hey'addani waxay sameeysay Cilmibaaris baddan oo kala duwan, waxaa ka mid ah baarista HEERKA WASAKHEYNTA BADDA XAMAR.

Baristaan waxaa lagu sameeyay 4meel oo kala duwan oo ku yaalla Xeebta Magaalada Xamar, waa kuwaan 4tii meel iyo heerka ay wasakheysan yihiin sida ay baaristu sheegtay:-

1- XEEBTA KAWAAN BARI: Heerka wasakhda goobtaan waa heer sare, waxaa laga baaray (total plat count) waa dhammaan kalan

noolaha ay ishu qaban sida (bacteria, fungi) taasoo aad ku arkeyso, mar kasta oo dhanka xeebta loo sii dhawaado, waxaa kaloo biyaha xeebtan ku yar (DO, pH) oo muhiim u ah noolaha badda hadii ay yaraadaana halis daran u geysan karo nolosha noolaha badda, sidoo kale waxaa xadka laba laab dhaafay (COD,BOD) oo ayaguna saameyn halis ku leh Kalluunka badda.

2- XEEBTA LIIDO: Heerka wasakhda goobtan waa heer ROON, marka laga reebo (DO) oo heerka standardka hoos uga dhacsan.

3- XEEBTA BUUR-FUULE: Heerka wasakhdu waa heer halis ah walxaha Kiimikada ee heerka standardka ka hooseeya ama ka sareeya waxaa ka mid ah (DO,pH,TURBIDITY, & COD), walxahaas oo heerkooda dhaafa ama ka hoos mara waxay wax yeeleen karaan qaab dhismeedka jirka Kalluunka, tarankiisa, jiritaanka cowska badda gunteeda ka baxo.

Sidoo kale goobtan waxaa si xad-dhaaf ah u dagay **(Total coliform)** oo ah nooc bacteria ah, iyo total **Plat count** oo ah noolaha ay ishu qaban Karin (bacteria, fungi, etc) kuwaas oo dadka badda ku dabaasha iyo kuwa Kalluunka isticmaala dhibaato u geysan kara.

4- XEEBTA DEKEDDA: Heerka wasakhda goobtan waa heer sare, walxaha laga helay waxaa ka mid ah: **(Oil & grease,Tss**) kuwaas oo noolaha badda wax yeelo aad u darán dhirta u geeysato sida, taranka Geedaha badda, Kalluunka iyo Shimbiraha badda, quruxda baddana saameyneysa. Sidoo kale (**Total plat count & coliform**) ayaa laga helay goobtan.


Sida daraasadaan **Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliya** ay sameeysay ku cad waxaa halis ku jirta nolasha noolaha badda taas oo dib ugu soo noqon karta dadka, ayna suurta gal tahay in ay halistan gaarto heer aan wax laga qaban karin hadii si deg deg ah aan wax looga qaban.

**<u>Natiijada Cilmibaaristaan wa tan:</u>**

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 2 RESULTS | SITE 3 RESULTS | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 6.13 | 6.16 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | | | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.67 | 5.29 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | 1.7 | 14.8 | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 9.8 | 22.0 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | 7805 | 7640 | 6630 |
| COD | 160 | 64 | 240 | 50 |
| Cd | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 6700 | 260 | 7700 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 7500 | 350 | 8700 | 25 – 250 |
| Total Coliform count; | 110 | 12 | 368 | NIL |

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|
| pH | 8.20 | 8.19 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | No | No | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 4.16 | 6.87 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 8.58 | 6.43 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| COD | 412 | 47.10 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | 164.50 | 20.50 | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | <0.001 | <0.001 | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 230 | 78 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 310 | 120 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 30 | 3 | 245 | 67 | NIL |

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 8.20 | 6.13 | 8.19 | 6.16 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | No | | No | | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.16 | 4.67 | 6.87 | 5.29 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | | 1.7 | | 14.8 | | | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 8.58 | 9.8 | 6.43 | 22.0 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | | 7805 | | 7640 | | | 6630 |
| COD | 160 | 412 | 64 | 47.10 | 240 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | | 164.50 | | 20.50 | | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | | <0.001 | | <0.001 | | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | | <0.01 | | <0.01 | | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37˚C; cfu/mL | 6700 | 230 | 260 | 78 | 7700 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22˚C; cfu/mL | 7500 | 310 | 350 | 120 | 8700 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 110 | 30 | 12 | 3 | 368 | 245 | 67 | NIL |




GOOBAHA BAARISTA LAGU FULIYAY IYO HEERKA WASAKHDA

# Warbixin: 300 Milyan oo sanadkii laga helo Kalluumeysiga Sharci darrada ee Badda Soomaaliya.

Khubaro ayaa ka digaya in kalluumaysiga sharcidarada ee ay sameeyaan maraakiibta waawayn ee ajnabiga inuu dib u soo celin karo burcad baddeeda.

Warbixin ay soo saareen Hay'adda Arrimaha Deegaanka ka hadasha oo la yiraahdo (One Earth Future foundation) Sep 16, 2015 ayay ku sheegeen in maraakiibta ay kalluumaystaan saddex jibaar inta ay kalluumaystaan Soomaalida, oo lagu qiyaasay (132,000 metric tan sanadkii, markii loo barbar dhigo kan kalluumeysatada gudaha ay sameeyaan sanadkii oo lagu qiyaasay 40,000 metric tan) iyagoo ka samaynaya in kabadan saddex boqol oo milyan oo dollar.

Warbixintan ayaa lagu sheegay in Kalluumeysiga sharci-darada ah uu si aad ugu soo kordhayo xeebaha dalka Soomaliya, waxayna ku dartay in kooxaha

Burcadbadeedku hoos u dhigeen kalluumeysiga sharci-darada ah ee Maraakiibtu ka sameeyaan xeebaha dalka.

Burcad baddeeda ayaa marar badan sabab uga dhigtay

weerarkooda inay ku joojinayaan kalluumaysiga sharci darada ah.


Hay'adan ayaa sheegtay in Soomaalidu dhaqaalaha ay ka helaan kalluunka uu gaarayo 50,000 oo milyan oo Doollar sanad walba halka Maraakiibta dalalkaas ka sameeyaan Kalluumeysiga in ku dhow 300-milyan oo doollar.

Iran, Yemen iyo waddamo qaarada Asia ayaa ah kuwa ugu badan ee qaata kalluunka qaaliga ah.

Badda Soomaaliya ayaa Hay'adan sheegtay iney qani ku yihiin noocyada kala duwan ee Kalluunka sida Tuunnaha oo ay tilmaantay in si weyn looga iib geeyo qaar kamid ah dalalka Caalamka.

Warbixinta ayaa sidoo kale sheegtay inay u daran tahay deegaanka, iyadoo shabaqyada kalluunka ee waawayn ee loo isticmaalo biyaha hoostooda uu baabi'iyo waxa badda ku dhex nool.

Waxaa xusid mudan in la tilmaamo in Iiraan ay ka qaadato kalluunka sharci darrada ah ee Soomaaliya laga dhaco 34%; weliba waxaa la leeyahay inta badan waxay ka kalluumeystaan meelo xaabaha ku dhow sida I




Labadii markab ee Iiraan dhowaan lagu soo qabtay xeebta Galmudug oo hal baxsaday asagoo hore ula cararay 4(afar) ilaalo ka ahayd; taasoo keentay in lagu soo caariyo kii kale xeebta; 21kii Kalluumeyste ee heer Iiraan ahaa lagu xirxiray baadiyaha Ceel-Buur; waxaana muddo beryo ah la sheegayay in dayaarado ay imaanayeen meelahaas, dadkana ay weydiinaayeen kalluumeysatadii. Waxay iigu muuqataa in tallaabtaa ah soo qafaalidda maraakiibta ku jirta howsha Burcad-Kalluumeysiga ah sidaas loola dhaqmo, ayadoo dadku ay difaacanayaan kheyraadkooda



**Maraakiibta Xadda Kalluunka Badda Soomaaliya ku jira.**

# Dowrka Qaanuunka ee ilaalinta  Deegaan Badeedka.

W/Q: Cabdiraxiim Warsame Diiriye Sugule

Waxaa muhiim ah marka hore in la ogaado ama lahelo  ahmiyadda aduunka uu siiyey ilaalinta deegaanka, waliba deegaan badeedka ama xeebta dalkasta uu leeyahay dhibaatada ku  iman karta sidii loo xakameyn lahaa ama looga hortagi lahaa, sidaas awgeed waxaa dunida kajira qawaaniin ama shuruuc  ka hadlaysa ahmiyadda ilaalinta deegaan badeedka iyo heshiisyo goboleed iyo kuwo heer caalami, waxaana ku sheegi doonaa shuruucdaas iyo heshiisyadaas dunida kala saxiixatay qormadan soo socota.

Waxaa kaloo xusi doonaa Qawaaniinta dalka Soomaaliya ee arimaha badaha ay tixgalin balaaran siisay ilaalinta deegaan xeebeedka  iyo sidii loo xakameyn lahaa dhibaatooyinka ku iman karta deegaanka looga hortagi lahaa,

Waxaan halkan ku qaaba dhigeynaa shuruucda iyo heshiisyada lasameeyey, oo aan u kala qaadi doonno  mid caalami, mid goboleed, iyo mid dalka uu leeyahayba

Waana sidan:-

1- Qawaaniinta dalka (qodobada ka hadlaya arimaha deegaan badeedka).

   Waxaan si kooban u dulmarayaa  intaan galin qodobada quseeya ilaalinta deegaan badeedka inaan xusno qawaaniinta dalkeena ka dhaqan galey ee dhanka badaha.

   Dalkeenna waxuu leeyahay qawaaniin u degsan oo soo marey waqtiyo kala duwan lagasoo bilaabo xiligii Dowladdii Daakhiliyada oo ka horeysay intaan laqaadan xoriyaddii 1960, waxaanna dalkeena ka hirgalay 4 sharci ama qaanuun badeed oo hirgalay, haddaan idiin taabto sidey u kala horeeyeen  iyo taariikhda ay soo baxeen waa: Qaanuun L.1 ee 21 febrayo 1959, Qaanuun L.7 ee November 1966 oo badal kusameeyey dhowr qodob Qaanuun L.1  21 febrayo 1959, Qaanuun L.37 ee 10 september

1972, Qaanuun L.5 ee 26 jannayo 1989kii ( oo ah kan asalka ah manta badalayna dhammaan kuwii ka horeeyey).

**Qawaaniinta Dalka iyo Deegaan Badeedka waxay ka xuseen.**

1- Kontarol la xiriira caafimaadka in lagu sameeyo dekadaha, maraakiibta iyo dadka soo galaaya jamhuuriyada si looga hortago cudurada faafa.
(QOD/7, F/61 EE SHARCI L.1,NOV:1959.

Sharaxaadda qodobkan: wuxuu sheegay in la kontoroolo dhammaan maraakiibta soo galaysa iyo doomaha dalka dakadihiisa, lagana kantoroolo dhanka caafimaadka rakaabka saaran iney sidaan cuduradda faafa, iyo in la kontoroollo caafimaad qabka markabka ruuxadiisa inuu nadiif yahay iyo in kale, haddii uu ciladeysan yahay wuxuu keeni karaa dhibaato dhanka wasakheynta deegaanka, iyo in laga kontoroolo dhanka oolyada iyo biyaha uuna ka wataa shahaadada caalamiga ah ee u asteysan maraakiibta u kala gooshta caalamka.

2- ka hortaga wasakheynta badda ee maraakiibta wuxuuna awoodda siiyey hay'adda ku shaqada leh ee wasaaradda D/G badda, qeybaha ay awoodda ku leedahay waxaa kamid ah, xeebta dalka, biyaha gudaha, badda dalka, qeybta xigta, qeybta dhaqaalaha iyo qeybta badda hoosteeda, waxaa kaloo ku jira awoodaha ku fulinta sharciga inta xadka ka baxsan haddii khatar ay ku keeni karto biyaha gudaha. (QOD/201. F/2. ee Sharci L.5, Jun:1989).

Sharaxaadda qodobkan: Wasaaradda Dekedaha iyo

G/Badda ayaa u xilsaaran ilaalinta deegaan badeedka xeebta , biyaha dalka iyo dhammaan biyaha hoos yimaadda awoodda J.F.S , waxayna kasoo saareysaa xeerar u gaar ah haddii ay aragto dhibaatada ku iman karta deegaan badeedka, dhibaatadaas ha ahaato mid katimaadda dhanka dhulka ama mid katimaadda dhanka badda.

3- Wasiirka D/G/B ayaa u xilsaaran meel marinta iyo go'aan ka gaarista heshiiskii caalamiga ahaa ee MARPOL loona yaqaan PROTOCOL 1978 EE KUSAABSAN XEERKA CAALAMIGA AH EE KA HORTAGA WASAKHEYNTA BADDA. (QOD/201. F/3. ee Sharci L.5, Jun:1989).

Sharaxaadda qodobkan: qodobkan wuxuu ka hadlayaa sidii loo dhaqan galin lahaa heshiiska caalmiga ah ee loo yaqaan protocol 78 oo ah sidii loo xakameyn lahaa ama looga hortagi lahaa wasakheynta badaha, wasiirkana wuxuu u xilsaaran yahay meel marinta sharcigan.

4- Dhulka xeebta (oo ka mid ah bii'ada badda): wuxuu xigaa dhanka dhulka, waxaanna laga soo tirinayaa xariiqda aasaasiga, wuxuuna gaarayaa 450mt, (QOD/10. F/3. ee Sharci L.5, Jun:1989.

5- Fulinta ciqaabta ciddii ku xadgudubta deegaan badeedka, xeebta dalka, wasakheyn, dhismo sharci daro ah oo laga dhisay dhulka xeebta inta lagu asteeyey inaan wax dhismo ah laga dhisin oo ah 450mt, waxaa lagu ganaaxayaa ganaax lacageed oo dhan 10,000,000 Shs.so ama xabsi.

(QOD/9.F/2. Ee sharci L.5, Janayo 1989).

**Qaanuunka Caalamiga ah ee (UNCLOS) iyo Deegaan Badeedka**.

Qaanuunka caalamiga ah ee (UNCLOS) waxaa la qabtey madashiisa ama heshiiska shirkaas 10 December -1982 waxaanna lagu qabtey caasimadda Jamaica, waxaanna kaso qayb galay 167 dal oo aduunka katirsan, waxaanna uu hirgalay sharcigaan 1994,

waanna xeer nidaamiyaha aduunka isku raacsanyahay ee hay'adda iyo maareynta badaha aduunka oo dhan, heshiis kastoo lasameynayana waxaa uu ah tixraac ama marjac loo noqdo heshiiskan UNCLOS.

1- Waxaa waajib ku ah dowladaha ilaalinta bii'ada badda iyo difaaciddeeda (QOD/192, ee UNCLOS ).
2- DAWLADAHA CAALAMKU WAA INAY ISKA KAASHADAAN SIDII LOOGA HORTIGI LAHAA WASAKHEYNTA BII'ADA BADAA...
 (QOD/194, ee UNCLOS).
Faafaahin: qaanuunka caalamiga ah ee UNCLOS wuxuu ka qabo ilaalinta deegaan badeedka waxa uu kasoo qaatey 2 qodob oo aad muhim u ah, oo muujinaya iney dowladuhu ka foojignaadaan sidii looga ilaalin lahaa wasakhda katimadda dhulka ama maraakiibta badda mareysa wasakhda katimadda ceelasha shidaalka, waxaa dowladaha kasaaran fulinta sharcigan hay'adaha ay khuseyso ama shaqada kuleh arintaan.

**Heshiisyada Caalamiga ah ee ilaalinta Deegaanka.**

- Marpol Protocol 1973/78.
- Solas 1974
- London convention 1954

Sedexdan heshiis ayaa ugu muhimsan dhanka caalamiga ah, kan hore wuxuu xooga saarayaa sidii looga ilaalin lahaa wasakhda badda, katimaadda dhanka maraakiibta, cilmibaarista badda laga sameyo, ceelasha shidaalka, iyo wixii kale oo lamid ah sidii looga dhowri lahaa wasakhdaas

biyaha badda ama deegaan xeebeedka ku hareeraysan, heshiiska labaad ee SOLAS wuxuu aad uga hadlayaa sidii looga ilaalin lahaa deegaan badeedka wasakhda ka iman karta markab ama doon ku dhex gubatay Dekedda ama biyaha dalka ama meel ka fog, ama laba markab is duqeysay halkaasna burbur uu ka yimaaddo burburkaas oo keeni kara wasakheyn baaxad weyn,

heshiiska sedexaad waxaa uu ka hadlayaa sidii deegaan badeedka looga ilaalin lahaa wasakhda katimaadda dhulka ku dhegan deegaan xeebeedka.

**heshiisyada Heer Gobol ee ilaalinta Deegaan Badeedka.**

- Nairobi convention 1985/96
- Jidda convention 1985.

Labadaan heshiis oo ay ku mideysanyihiin wadamada wadaagga xuduud badeedka ama dariska la ah, waxayna xoojinayaan heshiisyada caalamiga ah ee aan horey usoo xusnay labadoodana waa laba heshiis oo aad muhim ugu ah deegaan xeebeedka sidii loo wada ilaalin lahaa loona dhowri lahaa si wada jir ah oo siman.

# MANGAROOFKA SOOMAALIYA

## Qore: C/raxmaan Maxamuud Diiriye

### 1) GOGOLDHIG

Geedkaab Mangaroofka ah waa geed kubaahsan, xeebaha udhexeeya labada dhig (Tropical) eek ala ah **25°N-25°S.** waana geed ka duwan geedaha kale. Waayo xididadiisa intii aay dhulka hoos ugu quusi lahaayeen waxaay u soo baxaan banaanka. Maangaroofku waa geed faa'iido badan leh oo noole badan soo duma (jiito)

### 2) QEEXITAANKA MAANGAROOFKA

Maangaroofka waa geed ka baxa deegaanka xeebaha biyaha dhamaan leh. Weerta maangaroofku: waxey ka kooban tahay labo erey, oo kala ah:

MANGUE: waa weer asalkeedu yahay Boortuqiis, macnaheeduna waa geed.

GROVE: waa weer asalkeedu yahay ingiriis, macnaheeduna waa Hoyga.

Marka ereyga mangaroof micnahiisu waa:- Hoyga Geedka (meesha uu ka baxo).

Waa erey Cilmiyeed, deegaaned, kaasoo loo adeegsado inuu koobo geedahiisa yaryar iyo kuwiisa waaweyn oo laga helo meelaha aan horey uso xusnay iyo meelaha biyuhu moolkoodu dheereyn ee afka biyaha (Tidel).

### 3) MEELAHA LAGAHELO:

Dalkeena, geedka mangaroofka waxaa laga helaa xeebaha gacanka cadmeed iyo Badweynta Hindiya sida, Caanoolen iyo Bushbush oo labaduba kuyaala koonfurta Kismaayo iyo Jaziirada Sacaadudiin ee ku tal Gobolka Awdal gaar ahaan agagaarka Zeylac.

### 4) NOOCYADA MANAGAROOFKA EE DALKA SOOMAALIYA

Soomaaliya waxaa ka baxa sideed (8) Nooc oo geedka, Maangaroofka ah waxayna kala yihiin sidan hoos ku taxan:-

- Avicennia marina
- Bruguiera gymnorrhiza
- Ceriops somalensis
- Ceriops tagal
- Lumnitzera racemosa

- Sonneratia alba
- Xylocarpus granatum

## 5) WAXTARKA:

Mangaroofku wuxuu faa'iido badan uleeyhay goobaha xeebaha waxaa quuta xoolaha. Barootin fara badan ayaa ku jira, caleemahiisa waxaa loo adeeg-sadaa Daweynta Cudurada ku dhaca Beerka.

Deegaanka Mangaroofka waa deegaan hoy u ah kalluunka iyo noole fara badan. Sida: Shimbir baddeeda (sea bird) IWM.

Sidoo kale Mangaroofku waa geed cagaaran (evergreen) abaar iyo aaran.

Si geedkani looga badbaadiyo dabar go' in uu ku dhaco waa:

- Inaan loo isticmaalin geedkan xaabo iyo daaqa xoolaha, lana helo qawaaniin ilaalisa iyo wacyi-galin bulshadeed.
- In laga ilaaliyo wasakhoobida (pollution) badaha kala duwan gaar ahaan tan berriga (buburinta xeebaha)
- In loo ololeeyo sida ugu sahlan ee loo badin lahaa taranka mangaroofka lana daryeelo.

**Wadamada Afrika iyo baaxada uu ka daboolo geedka Mangaroofka ah:**

| Wadanka | Baaxadda | Wadanka | Baaxadda |
|---|---|---|---|
| Kenya | 609 Km2 | Madagascar | 2991K2 |
| Mozambique | 2909 Km2 | Seychelles | 32 Km2 |
| Somalia | 48 Km2 | South Africa | 30 Km2 |
| Tanzania | 1286 Km2 | | |

## 6) BADBAADADA GEEDKAN:

# Hab dhiska Doonta

W/Q: **Engineer Cabbaas Nuur Mahdi**

## 01- **Hordhac**

Marka aad doon maqasho waxaa isla markiiba maskaxdaada kusoo dhacaaya, iney tahey gaadiid lagaga talaabo biyaha nooc kasto ay yihiin sida: Badda, Wabiga, Harada, IWM. Gaadiidka biyaha loo isticmaalo, wuxuu soomaray heerar kala duwan waxaa ka mid ah:-

- Marka laga soo bilaabo NABI NUUX (CSW) oo ahaa qofkii ugu horeeyey ee doon dhisa, kuna badbaadiyey noolaha manta jooga, markii uu Alle ku amray inuu dhiso doon; kuna daabulo dadka inta rumeysey iyo xayawaanka noocyihiisa kala duwan, si daadad loogu maasheeyay inta diiday in ay Alle Rumeyso oo cirka iyo dhulkaba biyo loogu soo daadiyo.
- Xiligaa wixii ka dambeeyey dadka Aduunka ku nool, waxay doonta u noqotey gaadiid loo isticmaalo biyaha guud kiisa; sida, ku safrid, daabulidda xamuul, jalaabasho kalluun, dalxiis, iwm. Doonta waxay leedahay magacyo farabadan sida: Huuri, Markab, Doon, Laash, Iwm, oo ah sida ay u kala waaweyn yihiin.

## 02-HAB-DHISMEEDKA DOONTA

Doontii ugu horeysey waxaa laga sameeyey LOOXAAN iyo masaamiir, siduu Alle inoo sheegay (ذات الواح ودسور). Gabi ahaanba wax yaabaha doonta laga sameeya waa intaas.

Hase yeeshee, isbadalka aqoonta sancada, kala duwananta, qalabka (Technology) waxey soo bandhigtay xirfado kala duwan oo lagu sameyn karo doomaha.

Hadaba hadii aan soo qaadano doomaha lagu kaluumeysto waa faro badan yihiin waana kala waa weyn yihiin.

qaarkood gacanta ayaa lagu wadaa, iyadoo kuriixa Qaadooyin kasameysan alwaax, qaar matoor ayaa wada, qaarkoodna waa maraakiib waa weyn oo casri ah.

## 03- DOOMAHA CAAGA AH (Fiber Glass Boats)

Hadii aan hoos ugu daadegno, waxaa rabnaa in aan soo bandhigo, qaabka ugu sahlan ee loo dhisi karo doon kasameysan caag (Fiber Glass Boat) oo ah nooc dalka ku cusub, waxaa lagu xeri karaa matoorro, waana kala baaxad weynyihiin.

Doomaha Kaluumeysiga ee caaga ah: waxaa la dhisi karaa markaad haysato qalabka shaxda hoose ku xusan oo dhameystirran.

| Magaca qalabka | Nooca | Isticmaalka | Faa'iidada |
|---|---|---|---|
| Shalmaanta | waa tiirar adag ooka kooban shan walxood oo kale ah duf, bush, koolo, qarxiso, iyo alwaax oo leh qiyaas isku jaan go' an | Habeenta qaab dhismeedka doonta, waxaa kaloo kuxirma shalmaanka matoorka doonta, waana afar fadhi laba hore iyo labo danbe | Tirarka udubdhexaadka u ah doonta, motoorka doonta oo lagu xiro, wuxuu dheelitiraa marka cabir sugan loo jaro. |
| Masaamiir | Wuxuu noqon karaa bir, caag, ama qorey adag oo aarad leh | Waxaa isku dhajisaa qalabka kala duwan ay doonta kakooban tahey | Isku giijinta qalabka doonta Kasamey santahay |
| Alwaax | Wuxuu kasameysan yahey geed | Waxaa lagu dhisaa asaga iyo qalab kale shalmaanka doonta iyo dhinacyadeeda | Qaabeynta doonta Xajinta culeyska doonta. |
| Duf | Waa suuf caag ah oo duuban ahan lakab-lakab | Gufeynta tiirarka doonta, ku dahaarida Shalmaanka doonta waa in labo jeer lagu duubo ugu yaraan. | Wuxuu kadifaaca ineysan doonta biyo soo galin |
| Bush | Walxo kiimikeed oo u qaab eg sida suuf adke ah bal-balaaran. | Waxaa laga sameeyaa buudiga doonta, marka lagu daro dufta iyo koolada | Waxuu qurxiyaa gudaha doonta, |
| Qarxiso | ? | ? | ? |
| Kumasaato | Waa safiito adag | Waxaa loo istic maala gidaarada doonta iyo badkeeda. | Qurxinta habdhis meedka doonta waxey ka qeyb qaadata kadifaaca biyaha. |
| Koolo | Waa xabag | Waxey isku dhajisaa dhamaan walxaha doonta kasameysantahey. | Isku giijinta qalabka doonta, difaaca biyaha. |
| Sharooto | Waa caag duuban oo xabag leh oo bal-balaaran | Waxaa lagu dhajiyaa gudaha iyo banaanka doonta markii dufta , koolada iyo bushka leys ku daro waxeyna isku adkeyso walxaha layku daray si ay isugu dhegaan ilaa mudo 10 saacadod ah. | Sulubeenta ama xanaftirida dhismaha doonta. Soo saaridda qaabdhismeedka doonta |
| Buraash/ Roller | Alwaax timo leh ama Bir wareegsan Oo suuf leh | Waxaa lagu isticmaala ku dhayida doonta, koolada iyo rinjiga iwm. | Fududeynta howlaha xardhida doonta |
| Rule | Waa buraash timo leh | Waxaa loo isticmaala duubista qalabka doonta | |
| Rinji | Waa qad midabo leh | Midabeynta doonta iyo xardhidda | Ka ilaalinta daxaloobida biraha doonta kurakiban |
| Smoother Michine | Waa qalab lagu xanaftiro doonta | Waxaa lagu xuqaa xanafta dhismaha doonta si aay u noqoto ms sulub ah | Fudueynta hawsha xaftirka doonta,Qurxinta iyo isudheelitirka. |

Qalabka aan soo xusney (doomaha qiyaa-sahooda kala duwan) hadii aad heysato, waxaad awood u leedahey inaad dhisto doon cusub oo lagu xiri karo motor; kaasoo dhinaca danbe ku xirma ee loo yaqaano (foreboard), dhererkiiduna uu dhan yahey 7m, looga kaluumeysan karo badaha fog iyo kuwa dhow.

Sidoo kale Qalabka aan soo xusnay waxaa lagu dhisi karaa, doomaha nooca loo yaqaano (volvaha), oo motoorka doonta gudeheeda lagu xiro, dhererkeeda uu dhan yahey 10m, doontaan waxay isaga gooshi kartaa wadamo badan, waana doon gudaheedana uu weyn yahay.

Qaab dhismeed keeduna wuxuu u saamaxayaa dadka ku jilaanbanaaya, in ey bada ku jiraan oo ay kaluun jilaabtaan mudo ugu yaraan 10 habeen; waayo waxey leedahey barxad lajiifan karo, bakhaar lagu kaydsankaro kaluunka lasoo jilaabtey iyo baqaar lagu keydsankaro cunto la isticmaali karo mudo dheer.

**04- Sida loo DHISKA DOONTA FIBER GALASKA**

Doomaha fiber galaaska waxaa loodhisaa labo qaab qaab:-

- **Qaabka koowaad**:

Waa sida warshad oo kale waxaa jirta qaab dhismed doon u eg oo diyaarsan (stampo) oo lagu shubaayo qalabka doonta laga sameeyo oo laysku diyaariyay, kadibna waxaa lagula dhejiyaa bac xabag leh (sharooto) oo balaaran oo isku hayneeysa walxaha iyo satamabadda mudo toban saacadood (10hrs).

Kadib waxaa ka soo baxaaya marka laga fiiqo lasqadda doon wax u eg oo u baahan farsamo dhemeystir ah iyo adkeyn, waxaa lamariyaa mishin sima (smoother machine), si loo xanaftiro kadibna waxaa lagu dhejiyaa qalabkii lag u adken lahaa, sida fadhiyadda Shalmaanta.

Dufta oo labajeer ladhigo, inta aan shalmaanta la dhigin iyo kadib; wayo dufta waxay doonta ka celisaa biyaha soo galaaya, waxaa leysku daraa, (koolo+ qarxiso+Duf) oo doonta lamariyo.

Ugu dambeyntii waxaa lagu rakibaa motoorka wada doonta.

**Qaabka labaad:**

Waa qaab gacmeed, waxaa lagu dhisaa cabir loogu tala galay. Waxaa dhisa khabiiro ku takhsusay oo isku dheeli tira, waxaa la sameynayaa dhammaan talabooyinkii horay aan usoo xusnay oo kale iyo dheeraad qalabkiina waa lagu wada dhejinayaa,

## 05-MUDADA LAGU DHISI KARO DOON CAAG AH

Hadii la helo walxaha lagu dhiso doonta oo dhameystiran, qalabka dhismaha (doonta iyo cabirkooda), waxay qaadan kartaa mudo Shan (5) maalmood oo xirrir ah (Glass Repairable Plastic).

Dhererka doonta waxay noqoneysaa ilaa Todobo mitir (7m), waxaa lagu shaqeysan karaa mudo qiyaastii 10 sano ah.

**F.G: OGSOONOW**

Doonta caaga ah nooc walbo oo ka mid ah hadii ay cilad kutimaado sida dilaac ama dalool iwm, waa ladayac tiri karaa. laakiin hadii cilad ka timaado qaabdhismeedka doonta, sida: isku dheelitir la'aanta qalabka lagu dhisay doonta, dhinac u badashda culeyska doonta, waxaa ka imaan kara:-

- In doonto xoog bixin weydo.
- In ay dhinac u buurato.
- In xakamynta doonta iyo wadisteeda aysan dheelitirmin, iwm.

Sidaa awgeed howl dhamaystiran lama dhihi karo; waayo kama bixi karto howsha badda ee loogu talagalay in lagu fuliyo.

Waxaan rajeynayaa in maqaalkani wax uun usoo kordhiyo cidkastoo daneeyneeysa.

Mahadsnidin.

GRP




Doon caag ah oo dhextaalla biyaha xeebta kuna xiran yahay 15-KV matoor **ah**

# MAXAAD KA TAQAAN MURJAANTA BADDA (CORAL REEFS)

W/Q: Musatfa Xasan Nuur




## HORUDHAC

Baddu waxay ka mid tahay nicmooyinka waa wayn ee Rabbi ku maneeystay makhluuqiisa, waxayna nolol iyo hooyba u tahay malaayiin noole ah oo kala duduwan, hadaba waxaan maqaalkan si kooban idinku iftiiminayaa mid ka mid ah makhluuqa ku nool biyaha badda oo loo yaqaanno MURJAAN (Coral Reefs).

**Waa Maxay Murjaan (Coral Reefs):**

Murjaanka (Coral Reefs) waa xayawaan dhagax la moodo ama

Buuro oo badda ku jira gaar ahaan qaybta oogada sare ee badda u

dhaw, jiritaankiisa nololeedna ay qayb libaax ka qaateen nafley yaryar oo loo yaqaano *hal unugle*

(Protists) markey isku biiraan waxay sameeyaan wax ka kooban

Unugyo badan (polyp), waxaa lagu tiriyaa inuu yahay xayawaan.

Murjaanka **(Coral)** waa malaayiin xayawaanno yaryar oo la yiraahdo hal-unugle, waxay u nool yihiin si isku xiran midba midka kale (unugba unuga kale ayuu ku xiran yahay), waxaa isku haya **nud (tissue)** yar oo balaaran, waxay kala soo baxaan biyaha badda **Kaalshiyom (Calcium)**, oo ay ka sameystaan qalfoof nuurad ah,

waxay ku dhagtaa hareeraha hoose ee Murjaanta (**Coral**), markuu dhinto wuxuu ka tagaa qalfoof nuurad ah oo la moodo dudumo badeed oo kale; taasoo loo yaqaano Murjaan (**Coral reefs).**

Waxaa kaloo lagu macneeyay (Qaamuuska Soomaaliga) **dhagax-la-mood** guduud iyo midabyo kaleba leh, oo sameeya bahallo yar yar oo badda ku jira. Wuxuu kale oo sheegay in uu u dego beel beel, isla markaana leeyahay qaabab badan oo qaarkiis sida geedaha laamo u leeyihiin, qaarna buur dhagax ah u egyihiin, qaar kalena Jasiirado waa weyn bay noqdaan.

Marka si guud loo eego, la iskuna dayo in xarriijin muuqata oo kala soocda la dhexdhigo dhirta iyo xayawaanka, waxay noqon kartaa in dhirtu cuntada samaysato, xayawaankuna nafleyda kale cuno. Hadaba, iyada oo ay sabab u tahay "Protists" nafleyda yar yar oo isaga gudihiisa ku nool, murjaanku sida xayawanaka nafleyda kale ayuu cunaa oo laamihiisa oo fidsan habeenkii ku qabsadaa "Plankton", sida dhirtana wuxu ka faa'iidaystaa qorraxda + $CO_2$ + $H_2O$, taas oo ay ka caawiyaan nafley hayb ahaan loo sii yaqaan **"Zooxanthellae**"( waa hal unuglay yaryar oo algae ah ) oo gudihiisa ku nool kana caawiya quudashada cunta sameynta. Murjaanka madaama uusan socon sida dhirta oo kale, gacan siinta nafleydaasi waxay u ogolaataa in uu ku beermo kuna noolaan karo meelo cuntadu ku yar tahay, laakiin ifka qorraxda ka helaa qayb wanaagsan. Ifka qorraxda ka sokow murjaanku wuxu u baahan yahay meel biyuhu saafi yihiin oo aan ciid jilicsani ku milmin ama wasakh kalaba, isla markaana aan biyuhu qabow iyo kulayl midna ahayn. Waxa la isla qiray in uu si fiican ugu tarmo biyaha kulaylkoodu u dhexeeyo 25-29$C^o$. Murjaantu ama **(Coral Reefs** ku) wuxuu ku jiraa qaybta

xayawaanka ku nool biyaha badda.

## FAA'IIDOOYINKA LAGA HELO MURJAANTA

**Murjaantu** waa mid muhiimad wayn u leh malaayiin noole oo ka mid ah noolaha badda ku jira iyo Barigaba, sidaa awgeed waxaan halkan idinku soo gudbinayaa kuwa laf dhabarta u ah ([1]):

- ✓ Wuxuu ka dhigan yahay gidaar caabiya hirarka badda, si aanay xeebta xoog ugu soo gaarin xeebaha, kana ilaaliso nabaad guur ku yimaada carrada xeebaha oo nolol badan ka jirto sida mangrove-ka
- ✓ Waxay hoy u tahay malayiin noole kala duwan
- ✓ Waxay qani ku tahay curriyaha Nitrogen, Carbon iyo waliba nofaqooyin kale oo muhiim u ah noolaha.
- ✓ Waa caawiye wareegidda nafaqada.
- ✓ Qayb libaax bay ka qaadataa nolosha silsilada cuntada ee badda.
- ✓ Meesha ay ku badan tahay Murjaantu, waxaa ku bata malayiin xayawaan oy ka mid yihiin Kalluunka.
- ✓ Waa kaynta kalluunku ku dhalo, isla markaana kalluunka yar yari ku dhuunta inta uu korayo
- ✓ Wuxuu leeyahay qurux loo daawasho tago Dalxiis ahaan.
- ✓ Wuxuu ka mid yahay dhagxaanta aad u qiimaha sareeya sida ku xusan (Suuradda al Raxmaan aayadda 22aad) isaga iyo lu'lu' (Pearl).
- ✓ Dawooyin baa laga sameystaa Murjaanta.

[1] http://reefrelief.org/the-importance-of-coral-reefs/

**Maxaa dabar gooya ama yareeya dudumo badeedka Murjaanka (Coral Reefs)**

Kalluumeysatada oo aan ilaalin nidaamka dabashada kalluunka IWM,

Taasoo khalkhal ku keeneysa silsilada cuntada noolaha badda (Coral Reefku), markuu isagu meesha ka baxana dhammaan xayaawaanadii hoy iyo cuntaba ka hali jiray ayaa lumeysa noloshoodu.

Wasakheynta biyaha baddu waxay ka mid tahay wax yaalaha dabar gooya Murjaanka (Coral Reefska). Hadaba noolahani wuxuu u baahanyahay biyo iyo hawo nadiif ah si uusan u dabar go'in ([2]).

[2] http://www.icriforum.org/about-coral-reefs/status-and-threat-coral-reefs

# MAGACYADII LOO AQOON JIRAY DALKA SOOMAALIYA

ADM. Prof. Faarax Axmad Cumar

## MAQAALKII 4AAD

Waxaan ku soo qaadannay maqaalladii hore magacyadaan loo aqoon jiray dalkeenna ama qeyb ka mid ah waana sidan :-

1. Punt-land laga soo billaabo qarnigii 27-4(23Q) C.H. Asalka magacu waa Masar.
2. Phunt (Funt), Qarnigii (13-6) = 8 Qarni C.H. Asalku waa Yuhuud.
3. Kush (Dhulka dadkii madoobaa), qarniyadii 12-5 (8 Qarni) C.H. Asalku waa Masar, faahfaahintiisa ka eeg maqaalkii 1aad.
4. Ethiopia (Dhulkii dadka madow). Qarniyadii (5C.H-13 C.D). 18 Qarni, Asalka magacu waa Giriik.
5. Xabashi (Dhulka dadka madow ama isku dhafka ah). Qarniyadii (5CH-13CD). 18 Qarni, asalku waa Xijaas iyo Yamen, wuxuuna ku macno yahay 100% Ethiopia.

F.G: Magacaan Xabashi waxaa ka dhashay mid kale oo ah asagoo si xun loogu dhawaaqay waana ABISIINIYA oo ilaa hadda loo yaqaan dalka Ethiopia. Wixii faahfaahin ah ka aqriso maqaal L.2

6. Macaafir (Mafartiis) oo ka yimid Yamen oo xeebaha Soomaaliya ee Badweynta Hindiya ku lahaa joogitaan, gaar ahaan mid ganacsi ah, waqtiyadii Dowladihii Yeman ka kacay ee MACIIN (1500 CH), SABA (1000 CH), Ximyar (5CH-6 CD).
7. AZAANIYA, wuxuu soo shaac baxay ka dib dhalashadii Nabi Ciise (CS), waxaana loo aqoon

jiray xeebta Soomaaliya ee Bari iyo Koonfur ee Badweynta Hindiya; wuxuuna ku soo baxay khariidadii Bateyleymus (Plotemy) Qarnigii (3 CD). Magacaan waxaa u yaqiin Soomaaliya Dowladdii ROOMAANKA (Roman), gaar ahaan. Faahfaahintiisa ka fiiri maqaal L.3.(eeg khariidadiisa hoos ku qoran).

F.G: waxaa aqoonyahanno badani qabaan in magacaan uu ka yimid CAZAAN oo ahayd saldanad Yaman ah, Samenkii Dowladdii Ximar, Roomaankuna u aqriyeen AZAAN. eeg maqaal L.3

Magacyada maqaalkaan afaraad aan ku soo qaadaneyno waxaa ka mid ah: ZINJ IYO BARBAR.

8. Zinj (ama zinji), taariikhdiisu waxeey u noqoneysaa inta aan ognahay qarnigii 3aad ee ciise dabadii C.B, warkaan waxaa lagu qoray naqshad – dhagax oo sheegaysa in IIRAAN ay la ganacsan jirtay Boqorka Afric Zinji oo lagu qiyaasay in fadhigiisu ahaa jaziirada xaafuun 297dii. kalmada Zinji waa af IIRAAN, waxeeyna macna qabtaa MIRIIRKA BIRTA (La macna ah MADOW, ama dadkii madoobaa), sidii kalmadaha kale: Ethiopia , Xabashi iyo BARBAR oon soo xusi doono kalmadaha Zinji, waxeey ku qoreeyo khariidadii plotemy qarnigii 3aad ee ciiso dabadii.

Maadaama qarniyadii hore ay ku tartamayeen somaaliya magacyo badan aan qaarkood soo xusnay oo dhammantood ama intooda badani ay tilmaamayeen MEDEB MADOW, qaar ka mid ah wey go'een oo waa la hilmaamayey qaar kalene waxay soo gaareen qarniyadii dhexe sida: xabashi (ethopia) zinji iyo barbar aan ka hadli doono dhawaan.

Aan dhageeysano Yaaquut alxamawi (G.1228 C.D), waxuu yiri:

1. Reer seylac waa barbar waa kuwa madmadoow oo deegaan ahaan u dhaxeeya dhulka xabashida iyo kan zinjiga(2)
2. Berbera waa dhul u dhaxeeya kan xabashida, kan zinjiga iyo kan yaman, xeebta badda yaman(G.cadmeed) iyo badda zinji (badweynta hindiya)(3)

Halkaan waxaad ka garan kartaa in magacyadii ay kala yeelanayaan deegaano, halkii barigii hore ay wada tilmaamayeen deegaanka dadka MADOW.

Hada dalka Xabashi waxuu ku saloobay Buuralaw AMXAARADA, halka barbar ay ku salowday xeebta gacanka cadmeed, zinjina uu noqday xeebta badweeynta hindiya.

3. Muqadisho, Yaaquut ayaa warka watee, waa magaaalo xuduuda dhulka zinji dadkeeduna waa barbar aan ehayn barbarka woqooyiga AFRIKA, waana kuwa muuqaal ahaan u dhaxeeya xabashi iyo zinji.
4. Waxuu ka yari Yaaquut MARKA: waxay ku taal dhulka zinj, laakiin dadkeedu waa reer BARBAR. Halkaan waxaad ka arkeeysaa in reer barbar ay koonfur u sii riixayaan reer Zinji; waxayna taariikh ahaan muujineysa hayaankii soomaalida ee xag koofur.
5. Ibnu Batuuta oo Muqdisho booqday, kuna sugnaa 3 (saddex)

cisho, sanadkii 1331 C.D, waa ka dib geeridii Yaaquut, waxuu yiri; suldaanka Muqdisho waxuu ahaa BARBAR, afkaan ayuuna ku hadlaayey , waxuuna yaqiin afka carabiga.

9. BARBAR, magacaan waxuu isna ku soo arooray khariidadii plotemy ee Q 3aad CD, asagoo ku qornaa dhinaaca zinji oo xigta xaga xeebta (fiiri khariidada), waana magac la socday kan zinji,

waxaayna u eg tahay in magaca BARBAR uu muujinaayey gobollada soomaalilanda, kan zinjiguna uu muujinaayay gobolka bari,

kuna soo fiday xeebta badweyn ta hindiya, hase yeeshee magaca barbar ayaa u muuqda mid ku fiday dhulka gobolada dhexe iyo ka sii koofur, asagoo mar kasta u riixayey Zinji xagga koonfur, si kale hadii aan u iraahdo; REER BARBAR waxay koonfur u riixeen reer Zinji amaba iska dheh Soomaalidu waxeey koonfur u riixeen jareerta (BANTU).

Sidaas owgeed waxii ka danbeeyay qarnigii 12aad magaca zinji waxuu ka baxay dalkii soomaaliya, waxaana ku wada haray 2da magac ee xabashi iyo barbar ilaa uu ka soo daahiro magaca soomaaliya dhamaadkii qarnigii 14aad, oo meesha ka wada saaray magacyadii ka horeeyay, waana mowduuca maqaalkaan 5aad ee 01/01/2016ka INSHALLAH.





*Fig. 58. East Africa according to Ptolemy*

Maraajic (Reference):

(1) Nasiibdarro waan hilmaamay kitaabkii iyo qorihi

(2) Yanput: mucjam Al-buldaani, maadat:seylac

(3) Isaga maaddada Barbara

## TAARIIKHADA C. BADDA SOOMAALIYEEED

## MAQAALKII 4AAD

ADM. Prof. Faarax Axmad Cumar

Waxaan joognaa horraantii 1975kii, C.badduna wuxuu sugayaa maraakiib cusub. Sidaa aan hore u soo qornay C. baddu waxaa kale uu lahaa saddex saldhig (Barbera, Muqdisho iyo Kismaayo) oo kala joogaan 6 markab oo ah xeeb ilaaliyayaal, 4 markab oo torbeedo – xambaare, jirkoodu yahay loox, 3 Urur Dillaaxin iyo 13 bar ilaalo oo ku teedsan xeebta min Seylac ilaa Raas kambooni, intaa waxaa la jira hal dugsi farsamo oo Xamar ku yaal iyo hal dugsi oo gaadiidka laga soo saaro ( Baraawe ), iyo Taliskii C. Badda oo ku yaallay Muqdisho.

Dhex-bartankii 1975kii waxaa soo noqday askartii (Badmaaxiintii) iyo Saraakiishii loo soo tababaraayey maraakiibta casriga ahayd oo xambaarta Sawaariikhda (Gantaalaha ) Bad-Bad iyo Bad-


Dhul iyo madaafiic ah 4x30mm (4 dhuun oo 30 mm ah) oo Daqiiqadii tuuraaya 4 x2000=

8000 xabbadood oo loogu talagaley ka Difaacidda markabka Dayuuradaha cadowga. Bilo yar ka dib waxaa soo gaaray (Dekedda) Berbera oo saldhig rasmi ah u noqtay maraakiibtaan afarta ah oo kala ah laba gantaal xambaare iyo Torbeed xambaare . Dhamaadkii 1975kii waxaa yimid 4 dejiye oo yar yar oo la kala geeyey Xamar iyo Kismaayo.




N. 343, *motosilurante classe « Shershen »* (pag. 566) (Tass, 1977

**TORBEDO TUURE**



Classe « OSA II », *motomissilistica* (pag. 566)

(g.c. JLC, 1979)

**GANTAAL XAMBAARE**

Waxaan xasuustaa taliyayaashii iyo injineeradii maraakiibta Gantaal- xambaarayaasha, waxayna kala ahaayeen:

1. G/LE Mowliid Xasan Faarax ( C.M. Salax), Taliye
2. G/S Ahmed Xaaji Cumar ( C. Saleemaan ), Taliye
3. Dh. Nuur Taqsiin ( H/gidir), Ingineer ( oo hadda ah G/S Taliye xig.C.Badda)
4. Maxamed Nuur Muxamed (Gorgaate-Hawiye), Ingineer Taliye Saldhig.



**AXMED XAAJI CUMAR**



**NUUR TAQSIIN**



**MAXAMED NUUR MAXAMED**

Runtii maraakiibtaan aad ayey casri u ahaayeen, waxayna u diyaarsanaayeen qaab weerar, sidoo kale Dejiyaashu waxay ka qaadayeen Cutub (koox =30 qof) oo ah dallaaxiinta

(komadandooska) Badda Saldhiga waxayna geynaayeen Saldhig kale ama xeebtii la doono, sidoo kale waxay qaadayeen taakuleynta: sida: raashin, Hub, Rasaas, Daawo …IWM.

Waxaan marna la hilmaami Karin rugtii farsamada ee Berbera oo runtii ahayd warshad lagu xanaaneeyo, misna lagu diyaariyo gantaaladda inta aan la saarin markabka

(4 xabbo ood moodid dayuurado yar yar ee markab kasta); sidoo kale kuwa torbeedyada ah.

Rugtani waxay muhiim u ahayd xoojinta C.Badda iyo awoodda X.D.S Soomaaliya.

Waa tii reer galbeedku ay ku sheeegi jireen in Barbera ay tahay Saldhig Ruush. Runtii anaga ayaa iska lahayn rugtaan, laakiin waxay ahayd meel halis ku ah cadowga, reyreyna u ah shacabka Soomaaliyeed.


Waxaa loo magacaabay taliyihii 1aad: G/le C/laahi Cali Nuur (Digil), kii 2aadna ee rugtaan 2x/le (hadda G/sare) Inj. Cabdi Warsame Cismaan ( xawaadle) oo hadda ah ku xigeenka AB/Ha C.Badda iyo Madaxa Howlgelinta Ciidanka.

Sanadkii 1976kii waxaa dalka soo gaaray markab ah dejiye (oo qaadi kara Urur, 4 Tank iyo 6madfac, kana dejin kara xeebaha aan Dekedaha laheyn, ha ahaato xeebata dalka ama tan cadowga kolba sidii loo qorsheeyey. Markabkaan waxaa la geeyey Saldhigga Kismaayo.



**CABDI WARSAME**

**DEJIYE DHEXE**




N. 520, *nave da sbarco classe « Polnocny V »* (pag. 567) (A.N., 1980)

**C.BADDA IYO DAGAALKII 77**

C.Baddu siyaabo kala duwan ayuu uga qeyb galay dagaalkaan, xag taakuleyn oo xooggeeda uu lahaa markabka Dejiyaha oo isaga gooshaayey Kismaayo-Muqdisho–Berbera; Saraakiil uga qeybgashay C.dhul ahaan.

Laakiin wacdaraha weyn waxaa dhigay 2 (labada) markab oo gantaala- xambaarayaasha ahaa. Subixii 22/7/1977, qorraxdu inta aysan soo bixin ayey maraakiibtu ka furteen Dekedda Barbera ayagoo duullaan ugu socda Dekedda Casaba oo Berbera u jirta 470km; Waxayna ka talaabeen ciriiriga Baab-Al-mandab 16:00 (4tii galabnimo ); Waxay la dheceen Sawaariikh Dekeddda Casab Saacaddu markay ahayd 17:30 (Nus saac ka hor gabal dhaca), ayagoo dhib weyn u geystay Dekaddaas oo aheyd tan wax ay uga soo degi jireen Ethiopia.

Nasiib darro waxaa xumaaday xiriirkii Soomaaliya ay la laheyd

M.Soofiyeet, taasoo keentay in dalka laga eryo khubaradii Ruushka oo dhowr kun ahayd 13/11/1977kii, halkaas ayaa C.X.D.S. (Dhul, Cir, Difaac cir iyo C.Badda) uu uga xirmay Albaabkii Hubka iyo Tababarrada Ciidaanka. C. Badda wax hub ah ma helin oo dheeeraad ah ilaa laga soo gaaro Burburkii Dowladdii dhexe ee Soomaaliya 26/1/1991kii.




**Midig Safka hore : Qoraha (L.1) Xeyd (L.2) Taliye M.Geele (L.3)Ab/le Khalif (L-5)**
**XALANE (L-4), Axmad Ismaaciil (L-6) & Axmad Xaaji Gacal (L-7)**
**Mid. Safka dambe: Macawisle, Saciid Marino iyo sarakil kale**

# Islaamka & Xuquuqda Carruurta

Maxamed Xasan Maxamed

Waxaa mahad oo idil u sugnaatay ALLE, Allaha siiya ruuxuu doono gabdho, ruuxuu doonana siiya wiilal, ruuxuu rabana isugu daro gabdho iyo wiilal, midkuu doonana ka dhiga ma dhale, naxariis iyo nabad-galyo Rasuulkeena Muxamed korkiisa Allaha yeelo .

Intaa ka dib, Islaamku waxa uu muhiimad gaar ah siiyay hagaajinta qoyska, maadaama uu yahay isha bulshada iyo aasaaska ay ku dhisan tahay bulsho.

Muhimada qoyska uu u dhisan yahayna waa in la helaa caruur, waana mid ka mid ah ujeedooyinka guurka loo jideeyay, sidaa owgeed ubadku waa miraha qoyska, waxayna u baahan yihiin ilaalin iyo barbaarin wanaagsan iyo in la dhowro xuquuqda ay leeyihiin.

Waxaan rabaa inaan kaga hadlo maqaalkan arimo ka mid ah xuquuqda ay leeyihiin caruurtu, waxaa loo kala qaadaa xuquuqda ay leeyihiin caruurtu laba qaybood oo kala ah:

1- Xaq ay leeyihiin dhalashadooda ka hor, iyo

2- Xaq ay leeyihiin dhalashadooda ka dib.

Waxaana muhiim ah in lagu dadaalo ilaalinta xuquuqdan aan faahfaahin doono, si dhallaankeenu u noqdo mid lagu hirto mustaqbalka kuna barbaara

dhaqanka toosan ee islaamka iyo bulshada.

## Xaqqa Caruurta Dhalashada Ka Hor

Caruurta waa wiilasha iyo gabdhaha mustaqbalka ee bulshada iyo tiirarkeeda, Islaamkuna wuxuu siiyay muhimmad weyn sidii loo ilaalin lahaa loona barbaarin lahaa, si ay u noqdaan kuwa soo kobciya bulshadooda kuna soo kordhiya afkaar iyo dhaqan wanaagsan, si loo helo ubad wanaagsan oo ku barbaara dhaqan wanaagsan, waxaa muhiim ah in lagu dadaalo arimahan soo socda oo qayb weyn ka ah xuquuqdooda:

1- In loo dooro Hooyo wanaagsan oo ku soo barbaartay dhaqanka toosan ee Islaamka, sababtoo ah waxay ku barbaarinaysaa caruurta waxa ay ku soo barbaartay, isla

mar ahaantaa waxay u noqonaysaa qofkii ay ku dayan lahaayeen oo ay ka baran lahaayeen dhaqanka wanaagsan; Rasuulkana (N.N.K.H) waxa uu yiri: "Dumar waxaa lagu guursadaa afar arin midood, hantideeda, sharafteeda, quruxdeeda iyo diinteeda ee ku guulayso mida diinta leh..."[(3)]

Xadiiskan waxa uu muujinaya arimaha lagu doorto dumarka, balse wuxuu aad ugu booriyay rasuulaka (N.N.K.H) ragga in ay ku dadaalaan mida diinta leh, maxa yeelay ayada ayaa mid haysata barbaarin iyo dhaqan wanaagsan

2- Waxaa kaloo lama huraan ah in loo dooro hooyo u go'an shaqada gurigeeda oo aan ka mushquulin xanaaneynta iyo barbaarinta caruurteeda, maxaa yeelay Islaamka wuxuu saaray haweynayda mas'uuliyada gurigeeda, marka haweeneyda muslimadda ah waxaa laga raba in ay soo saarto jiilkii umada iyo madaxdii mustaqbalka, waxaana shaqo iyo dhib ugu filan barbaarinta ubadka.

3- Waxaa jira dumar iska soo rida ilmaha ayaagoo aan waqtigooda gaarin taasi oo ah mid lagu tumanaayo xuquuqda dhalaanka, waana xad gudub, diinteena islaamka waa ay reebtay arinta, marka waxaa loo baahan yahay in laga hortago arinkaa oo mamnuuc ka ah aduunka oo dhan.

## Xaqqa Caruurta Dhalashada Ka Dib

Waxaan ka soo sheekeynay xuquuqda caruurta ay leeyihiin dhalashadooda ka hor, waxayna gogol xaar u noqonaysaa hadii lagu daadaalo arimahan soo xusnay in la dhowro xuquuqdooda dhalashadooda ka dib sida darteed way isku xiran yihiin labadaa qodob.

xuquuqda ay caruurtu leeyihiin dhalshadooda ka dib waxaa ka mid ah waxa soo socda:

1- In loo bixiyo magac wanaagsan oo ah magacyada muslimiinta.

2- In loo sameeyo Waqlal (Wanqal) hadii la awoodo, maxaa yeelay waa arrin Rasuulka (N.N.K.H) u sugay caruurta xaqna ugu leeyiin waalidkood in uu u sameeyo.

3- In la nuujiyo, oo uu helo nuujin ku filan, waana xaqqa ay waayahan dayaceen dumarka kana dhowrteen naaskooda, taasi oo ah

3 saxiix bukhaari xadith 5090

arin aan wanaagsanayn, maxaa yeelay nuujinta waxa ay qeyb weyn ka qaadataa koriinka ubadka dhinac kasta sida: ka hortaga cudurada, awood jir ahaan iyo mida maskaxeed.

4- In lagu barbaariyo diinta Islaamka iyo dhaqanka wanaagsan.

5- In uu helo ubadka waxbarasho tayo leh, laguna dadaalo sidii uu wax u baran lahaa, waxbarashadana waa iftiinka nolosha, waxayna ka qayb qaadataa kobcinta ubadka xaga maskaxda, hadaba sida loogu dadaalayo cuntada ubadka iyo caafimaadkooda, waa in si la mid ah loogu dadaala wax baridooda.

6-Sidoo kale waxay xaq u leeyihiin in la dhowro nafsad ahaan iyo maskax ahaan, oo laga ilaaliyo waxa ku abuuri kara cuqdad iyo niyad jab, waxaana ka mid ah:

* In aan loo sameyn cadaalad iyo sinnan ubadka dhexdooda ah, taas ayay ka dhalan kartaa cuqdad iyo is naceyb dhexdooda ah, balse haddii ay arkaan cadaalada waalidkood u samaynaya dhexdooda waxay ka baranayaan cadaalada iyo sinaanta bulshada, waxayna noqoneysa arin ka qeyb qaata dhqankooda oo toosa.

* Ubadka waxa dhisi kara maskaxdooda waxa ka mid ah naxariista ay ka helayaan waalidkooda iyo dhaqanka wanaagsan ee uu kula dhaqmayo , sidaa awgeed waxa laga rabaa waalidka in uu ahaado mid la dhaqma caruurtisa marar ka qaarna la kaftama ama la cayaara, sida uu sameyn jiray Rasuulkeena sharafta leh, taas oo mudan in lagu daydo, sidoo kale waxaa la sheega in Rasuulka (N.N.K.H) labada wiil uu awoowaha uu ahaa ay korka ka fuuli jireen asaga oo sujuudsan, kamana soo kici jirin illaa ay iskooda uga dagtaan ayaga, markaa waxay ina tusaysaa in naxariis loo sameeyo caruurta oo aan cabsi galin lagu hayn.

GUNAANAD: waxaan ku soo koobay hadalkayga in aan dhowrno caruurteena xuquuqda ay inagu leeyihiin, waxaana u jeedinayaa bulshada muslimka ah ee Soomaaliyeed in aan kawada shaqeyno ku barbaarinta caruurta dhaqanka toosan ee islaamka kana dhowrno xadgudubka, si ay u noqdan dadkii u halgami lahaa dadkooda, diintooda iyo dalkooda.

# DHAQANKII HORE EE SOOMAALIDA IYO KAN MAANTA

W/Q: C/WAAXID C/LAAHI DUCAALE

Dhaqanku waa hab-nololeedka gaarka ah ee bulsho leedahay kagana duwan tahay ummadaha kale. Dhaqanku wuxuu ka kooban yahay toddoba tiir oo kala ah: qaab-dhismeedka bulshada, farshaxanka iyo suugaanta, caadooyinka iyo hiddaha, afka ama luqadda, diinta, maamulka iyo habka dhaqaalaha. Dhaqanku wuxuu cabbiraa tayada nolosha ummadda, waxana dhaqanka lagu cabbiraa koritaanka bulshada, firfircoonideeda ama qaabka ay iskula jaan qaaddo si ay u xalliso dhibaatooyinka ummaddaas ka horyimaada. Dhaqanka hirgelintiisa, ilaalintiisa iyo xoojintiisaba waxa saldhig u ahaa oday dhaqameedka Soomaalida oo hubin jiray in aan magaca reerkoodu noqon mid lumiya sharafta iyo karaamada uu huwan yahay.

Hadaba Soomaalidu sideebay uu dhaqmi jirtay, hadase sideebay u dhaqtaa. Soomaalidu Waxay lahayd hogaan dhaqan iyo maamul soo jireen ah, waxaa la isugu imaan jiray geed la yaqaan oo la yiraahdo geedka garta, waxaana la soo sooci jiray inta lagu tuhmayo aqoonta iyo indheergaradnimada. waxayna wax ku dooran jireen qodabadaan soo socda :Aqoon, Waayo aragnimo, Heybad, Sharaf, Aaminimo, Deeqsinimo, Geesinimo, Codkarnimo, Xilkasnimo, Samir, go’aan adayg iyo Hawlkarnimo.

Markay arrini timaado waxaa loo kala qaadi jiray 2 qaybood waxaa la oran jiray war arnintu ma Ugubaa mise waa soo jireen? Waxaa ugub laga wadaa xaajada adag ee aan horay loo arag mid la mid ah marka si loogu sameeyo xeer cusub waxaa la samayn jiray in Geedka la isugu keeno dhamaan wixii waya arag ah waxaana loo saari jiray gudi ka soo tala bixisa, gudigaasi waxay soo saari jireen xukun ama xeer lagu xugumo wixii la mida. Wayna ku qanci jiray labada dhinac ee arrinku dhexmaray.

Hadiise ay tahay dhacdadu mid Curad ah oo horay uga soo dhacday deegaanka ay dagganyihiin, waxaana la raaci

jiray kabtii ka taalay dhacdadan. Waxaana jiray xeerar udagsanaa Soomaalida dhexdeeda sida xeerka marti galinta oo ahaa mid lagu ceebeeyo qofkii martida ku soo hoyatay marti galin waaya, xeerka bir magaydada oo ahaa hadii dagaal dhaco inaan ladilin dadka BIRI- MAGEYDADA ah sida; Culimada, Duqayda, Carruurta iyo dumarka [4].

Dhaqankeena Soomaaliyeed waxaa ka mid ahaa inuu qofku hanti yeesho (waxyeesho), waxaana la'samayn jiray in cunuga neef xoolaa la siiyo marka uu dhasho ama inta uusan qaan gaarin ka hor, dhaqanka noocaa ah ee cunuga xoolaha lasiinayo waxaa loo yaqaanay (xuddumid). Haddaba macnaha iyo ujeedada qotada dheer ee ka danbeysa xuddumida waxay tahay in cunuga lagu baro lex jeclo iyo wax lahaansho, iyadoo dadka cunuga xuddumaya ay yihiin waalidkiisa ama dadka ka masuulka ah.

**Soomaalidu waxay uu soo joogeen saddex jiil**

Facii ugu horeeyay waxay soo joogeen:

- Xoolaha la dhaqdo oo uu farasku ugu mudan yahay, ugu qiimo badan yahay, looguna jecelyahay,
- Inanta la doonaayo in la guursado oo la hiddo-raaco, dibna loogu noqdo halka ay ka soo jeeddo min hooyadeed ilaa ayeeyooyinkeed, aabbaheed ilaa iyo awoowayaasheed
- Iyo garta niqiddeeda oo lagula cararo, loona geeyo oo loola tago, laguna aamino wadaadka ama sheekha ugu af-dheer culuunta diinta islaamka marka meselo la isku qabto.

- facii labaad waxay soo joogeen:

- Xoolaha la dhaqdo oo uu geelu ugu mudan yahay, uguna qiimo iyo qaaye badan yahay, loo guna jecelyahay,
- Inanta la doonaayo in la guursado oo aan si durugsan loo hiddo-raacin ee la is weydiiyo waa ina ayo iyo waa tuma hooyadeed oo keliya
- Iyo garta oo loola tago, loona geeyo niman xeer-beegti loo yaqaan oo ka

[4] http://www.somaliska.com/maqaal-soomaalidii-hore-iyo-tan-maanta/

mid ah odayaasha geed-joogayaasha ah ee ardaayada qabaa'ilka ah.

-facii saddexaad waxay soo joogeen:

- xoolaha ugu mudan yahay, looguna jecelyahay lacagta ama kaashka (lacagta caddaanka ah),
- Inanta la doonaayo in la guursado oo uu dookha wejigeedu go'aamiyo ama la dhaho ma dhidigtahay, mudnaanta aan la siin qoyskooda (aabbaheed iyo hooyadeed) iyo halka ay ka soo jeeddo
- Iyo garta oo lagula cararo oo loola tago, loona dhiibto odayaal ka duwan kuwii barigii hore.

Saddexdaa jiil ama difcadood ee soomaalidu uu soo kala martay waa caqli-gal ah in jiilba kan kale la yaabo, waxaase xaqiiqo ah in jiil kasta uu leeyahay samaan iyo xumaan, qofka aadamiga ahi marka uu hiddihiisa iyo xaqiiqadiisa ka sal kaco, wuxuu ku dhacaa dhaqan doorsoomid. Wuuna la qabsan waayaa oo daalaa-dhiciista ayaa bata, meel cidla' ah ayaanu ugu dambaynta ku soo dhacaa. Waxa qummaan in qofku hiddiihiisa iyo dhaqankiisa la fal-geliyo yiqiintiisa iyo qiyamkiisa diineed, sooyaalkiisana aanu ka hayaamin ee ku sargooyo diintiisa iyo nolosha casriga ah ee aan is diidanayn. Soomaalida waxay hore ugu maahmaahday oo tiri "**Faras aanad lahayn futo xanuun baa laga qaadaa**".

Soomaalidu barigii hore waxay ahaan jireen kuwa u kala baxa; Dhaqato iyo Qodato.

waxaa loo qaybin jiray iyakoo loo eegaayo waxay isticmaalaan dhaqan ahaan; Qarbadle iyo Haanle.

waxaa kale oo la odhan jiray; Qolqol'joog, Qodaal'joog , qoori'joog iyo reer'guuraa.

Waxaa bedalay; Qurbe'joog, Suuq'joog, Magaala'joog iyo Tuulo'joog.

dhoofku wuu jiray waxaa loo yaqaanay tacabir, taarget iyo talagal ayuu lahaan jiray. kadib waxaa soo degi jiray, jannaale iyo sii maan.

Waxaana soo baxay erayo cusub oo badalay maah maahyihii iyo maasooyinkii dhalin yaradu isku fahmi jirtay, waxna isugu gudbin jireen, waxaa badalay erayo cusub oo dhan loo raaco aan lahayn sida Cagta'udhig, cirka'udir, uu calaamadi, cashar sii yuu calaacalin, caynka'ujiid, ceeryaamo saar, indhaha'ujeer, qadh'uxidh kuda'a, ku'afuuf, barafee, budkasaar, ha' ubixin, bacda'ucunsii.

# AKADEMIYADA CULUUMTA BADDA IYO QAANUUNKA DOWLIGA

Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaliyeed waxay aasaastay AKADEEMIYADA SARE ee lagu barto Culuumta Badda iyo Qawaaniinteeda.
Akadeemiyadu hadda waxay ku billabanaysaa labo Kuliyad (Faculty) oo kala ah Culuumta Badda iyo Qawaaniinta Badda, mid Soomaaliyeed iyo mid Caalamiba.

Baahi weyn ayuu dalka u qabaa Culuumta badda waayo, tusaale ahaan: Kalluunka waan la soo baxnaa waana cunnaa, laakiin ma ognahay inuu caafimaad qabo iyo in kale, biyaha uu ku nool yahay kalluunku, deegaan ahaan, ma bad qabaa, mise maya; ma u dhan yihiin wax uu malaygu quuto, ku neefsado ku tarmi karo IWM.

Xaga Qawaaniinta Badda, dhibaato balaaran ayaa naga heysata xaga aqoontiisa, gaar

ahaan Qaanuunka Dowliga ah ee badda oo cid taqaanba la la'yahay gebi ahaan.

Hadaba si loo daboolo baahidaas aqooneed ayaa hey'addaanu abuurtay **AKADEEMIYADAAN**, waxayna shaqo geli doontaa dhawan. Wax kharash ahna laga qaadi maayo ardayda. Hadaba cidii dooneysa inay wax kabarato AKADEEMIYADAAN, waxay kala soo xiriiri kartaa Telefoonadan: 0615152000, 0615522680, hadii kale kaalayoo AKADEEMIYADA oo ku dhaw Dudsigii hore ee Badda, Degmada C/Caziiz .






# MUNAASABAD LAGU MAAMUUSAYO MAALINTA CALANKA OO LAGU QABTAY MAGAALADA MUQDISHO

Munaasabado waa weyn ayaa Lagu qabtay Magaalada Muqdisho ee Caasimada Soomaaliya kuwasoo lagu xusaayay Maalinta Calanka Soomaaliyeed oo maanta ku began 12/10/2015.

Madaxweynaha Jamuuriyada Soomaaliya, Ra'isul wasaaraha dalka, gudoomiyaha Barlamaanka Soomaaliya, xubno ka tirsan labada gole ee dowlada Soomaaliya, Saraakiisha Ciidamada qalabka sida, gudoomiyaha gobalka Banaadir ahna duqa magaalada muqdisho, Fanaanin, iyo dad shacab ayaa maanta kasoo qeyb galay xaflad lagu qabtay aqalka dowlada Hoose ee Gobolka Banaadir.

Madaxdii goobta ka Hadashay waxaa ka mid ahaa wasiirka warfaafinta dowlada Soomaaliya Maxamed Cabdi Xayir Maareeye isagoona sheegay in maanta ay tahay Maalin ku weyn dhamaan Umadda Soomaaliyeed meel walba ay dunida ka Joogaan

Raisul-wasaaraha Soomaaliya Cumar C/rashiid Cali Sharmarke oo goobta ka Hadlay ayaa sheegay in maanta ay tahay maalin dhamaan umada Soomaaliyeed ku weyn Calanka waxa uu ku Tilmaamay in uusan aheyn mid kaliyah loo sameeyay Jamhuuriyada Soomaaliya laakin sidoo kale uu yahay mid ka dhaxeeya dhamaan umadda Soomaaliyeed.

Munaasabada waxaa sidoo kale ka Hadlay Gudoomiyaha Barlamaanka Soomaaliya Mudane Maxamed Sheikh Cusmaan (Jawaari) isagoona dhammaan Umadda Soomaaliyeed ugu baaqay in la isku baraarujiyo muhiimada uu leeyahay calanka Soomaaliya.

Madaxweynaha Jamhuuriyada Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud oo munaasabada soo xiray waxa uu Umadda Soomaaliyed u sheegay in aysan waxba ka jirin hadalada dhawaan lagu daabacayay qaar kamid ah baraha Internedka oo lagu sheegayay in astaamaha Calanka wax laga bedalay.







Maanta oo ah 12-ka Oktoober ayaa ku beegan sannad guuraddii 61aad ee helida Astaanta ama CALANKA Qaranka Soomaaliyeed. Maalintan ayeysan qiimaheeda dad badan oo Soomaali ah aysan la socon, taasi oo ay sabab u tahay sida ay u wiiqantay Wadanimadii Soomaaliyeed.

Calanka Waxaa la sameeyey Taariikhdu markay ahayd 12kii Oktober 1954tii, waxaana sameeyey ilaahay ha u naxriistee marxuum Maxamed Cawaale Libaan.

Alla ha u naxriistee Maxamed Cawaale Libaan oo ahaa nin wadani ah ayaa in badan oo Shacabka Soomaaliyeed ah aysan aqoon magaciisa iyo waliba Muuqaalkiisa, waana ninka Sawirkan ka muuqda.

Marxuumka ayaa markii u sameeyey Calanka wuxuu dood dheer la galay dad badan oo ayagu su'aalo ka weydiiyey astaamaha calanka, waxayna dooda ugu weyn ka imaaneysay dhanka Gumeystayaashii oo ayagu markii hore diiday Calanka Buluuga ah.

Maxamed Cawaale Liibaan illaahay Janadiisa haka waraabiyee wuxuu ahaa nin ay ku weyntahay isla markaana aad u qiimeeya Walaaltinimada Ummada Soomaaliyeed ee isku ISIR, AF iyo dhaqanba ah.

Waxayna taasi astaan u tahay Xiddigta cad ee Bartamaha kaga taala calanka Soomaaliyeed oo ka tarjumeysa Jeceelkii uu u qabay Soomaali-weyn oo ay xiligaasi kala qeybsadeen Awoodihii Reer Yurub iyo Itoobiya.

Talyaaniga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Itoobiya ayaa dalka Soomaaliya u kala qeybsaday shan qeybood oo kala ahaa:

1- Koonfurta Soomaaliya oo ah (Gobolada Puntland iyo inta kale ee kamid ah Bartamaha iyo Koonfurta dalka) xiligaasi gacanta ku hayey dalka Talyaaniga.

2- Waqooyi Galbeed oo uu hada ka dhisan yahay maamulka Somaliland, oo uu gacanta ku hayey Ingiriiska.

3- Soomaali Galbeed oo hadda Itoobiya ka tirsan tahay gacantana ugu jirta.

4- Waqooyi bari N.F.D oo hadda ka tirsan Kenya, xiligaasi ganacta ay ugu jirtay dowladda Ingiriiska.

5- Jabuuti oo xiligaasi gumeysanayey dowladda Faransiiska.

**Midabka Calanka:**

Midibka CADAAN-ka wuxuu ku micneeyey nabadgalyo, BULUUGA-na wuxuu ku tilmaamay Barwaaqadda dalkeena uu leeyahay, BADA, CIRKA (Hawada) iyo DHULKA. Sidoo kale midabka Buluuga ayaa lagu tilmaamaa midabka BIYAHA oo ah Aasaaska Nolosha.

Soo Bandhigidii Calanka

Dr. Cabdulkadir Cali Bolay oo kamid ah dhalintii SYL ee dalka Soomaaliya usoo halgamay oo ka hadlayey Ninkii hindisay astaanta Calanka Soomaaliya ayaa wuxuu yiri:

Markii uu Maxamed Cawaale Liibaan uu u soo bandhigay ururka SYL iyo kuwa mucaaradka ah ba dood dheer ka dib waxaa la isku waafaqay Muxaafid iyo Mucaaridba Calanka uu soo bandhigay Maxamed Cawaale Libaan.

Hase yeeshee markii loo geeyey maamulkii Talyaaniga ayaa diiday oo ku tilmaamay inuu u egyahay Calanka dalka Zair sidaasi darteed aan la ogoleen calan dal leeyahay in la qaato.

Balse Maxamad Cawaale Liibaan wuxuu Talyaaniga u sheegay in labada calan aanay isku mid ahayn sababtoo ah Calanka (Zaire) xiddigta ku dhextaal waa mid DAHAB / Huruud ah, sidaasi darteed maamulkii waa ogolaaday in la qaato calanka buluug ah xiddigta cad dhexda kaga taala.

Halgan dheer ka dib Ummadda Soomaaliyeed waxay ku guuleysatay una suurta gashay in ay yeelato calan aad iyo aad u qurux badan, kaasoo ka tarjumaya jiritaanka iyo himiladda Ummadda Soomaaliyeed oo ah in la helo Soomaali weyn oo mideysan "Pan Somalism".

Calanka Qaranka Soomaaliyeed oo maanta 61 sano jirsaday, wuxuu ku yimid halgan adag oo loo soo galay, halgankaasoo ay hogaanka u hayeen dhallinyaraddii Soomaaliyeed xisbigii SYL kuwaas ka soo horjeeday ama diidanaa gumeysiga iyo gumeysi kalkaalayaasha.

**Taariikh Kooban:**

Waxaan jeclahay in aan si kooban u xuso halgankii gobonima-doonka Soomaaliyeed iyadoo maanta loo dabaal degayo 61 guuraddii astaanta calanka u ah Qaranimadda Shacabka Soomaaliyeed.

Waxaana jeclahay dhallinyaradda qurbaha ku dhallatay iyo kuwa dagaalkii sokeeye ka dib dhashay ee ku nool dalka in ay fahmaan dhibaatadda xanuunka badan loo soo maray xornimadda maanta aynu haysano.

Runtii xornimadaasi kuma aysan imaanin si fudud balse waxaa loo soo maray halgan adag oo dhiig fara badan loo daadiyey, sidaasi darteed waxaa loo baahan yahay in dhallinyaradda maanta joogta in ay ku daydaan doorkii wax ku oolka ahaa ee dhallinyaraddii Soomaaliyeed ka soo qayb qaadatay xornimadda.

Dhallinyaro ka kooban 13, waxaa u suurta gashay markii ugu horeysey taariikhduna ahayd Bishii May 15, 1943-kii in ay abaabulaan urur dhallinyaro gobannimo-doon ah oo la magac-baxay S.Y.C Somali Youth Club oo aan siyaasi ahayn.

Xisbigii S.Y.C. ahaa wuxuu isku beddelay urur weyn oo siyaasi ah lana magac baxay S.Y.L. Somali Youth League, ururkaasi waxaa albaabadda loo furay taariikhdu markii ay ahayd May 15, 1947kii kaasoo go'aansaday halgan siyaasadeed oo gobannimo doon ah, sidii loo gaarsiin lahaa Shacabka Soomaaliyeed xornimo taam ah.

Waxaa xusid mudan 11.01.1948dii waxay ahayd maalin xamaasad weyn leh taasoo ahayd tii ugu xoog badneyd uguna caansaneyd, sababtoo ah waxaa dhacaayey gudoonkii Aayaha Ummadda Soomaaliyeed, Maanlintaasi oo ay dhaceen dagaalo ba'an oo ay ku dhinteen 52 Talyaani ah iyo kuwa kale.

Maalintaasi waxaa dalka ku sugnaa guddigii ka socday 4ta dowladdood ugu xoog weyn ee adduunka oo ku guuleystay dagaalkii labaad ee Addunka kan koobnaa, dowladda Mareynkanka Mr. Utter, dowladda Ingriiska Mr. Stafford, dowladda Ruushka Mr. Feodorof iyo dowladda Faransiiska Mr. Burin Des Rosier.

Guddigaasi oo ka socday 4tii dowladood waxaa u suurta gashay maalintii ay bishu ahayd 20kii Janaayo 1948 in ay la kulmaan xisbigii SYL iyo xisbigii HYC (Hamar Youth Club) oo ay isku mabada'ahaayeen ururka SYL iyo axsaabtii mucaadka ahayd oo ku bahoobay daladda "umbrella" la magac baxday Patriotic Beneficient. Kuwaasoo ka koobnaa todoba urur oo yar yar.

Guddigii markii ay dhageysteen doodihii faraha badanaa ee halkaasi laga soo jeediyey , waxaa u cadaatay in xisbiga SYL iyo HYC ay haystaan taageeradda Shacabka Soomaaliyeed, taasoo ay la yaabeen qabkii iyo hanaankii ay u soo agaasimeen warbixinadaasi oo soo jiidatay guddigaasi, waxayna balan qaadeen in ay u gudbin doonaan Jamaciyadda Qaruumaha ka dhaxeysa.

Taariikhda markii ay ahayd Oktoober 12.10.1954kii Shacabka Soomaaliyeed u suurto gashay in ay hanato calanka buluuga ah ee sharafta badan oo aan maanta aanu ku fano. Abwaakii Cabdullahi Qarshe heestiisi calanka oo ah:

Qolobaa calankee

Kuwaa ceynoo,

Innagaa keenu waa – Cirkoo kale'e

Ee aan Caadna-laheyn – Ee aan Caashaqee

Xiddig Yahee Cadibaa – Naa-Ciidamisee

Caradaan Kaligaa Aadow Curatee

Adceeda Sideeda ee CAAN Noqo'ee

Dr. Cabdulkadir Cali Bolay

Waxaa Tariikhda Calanka iyo SYL soo diyaariyey Dr. Cabdulkadir Cali Bolay oo aan aad ugu mahadnaqeyno wakhtigiisa uu geliyey iyo taariikhda uu noo soo koobay.

Horseed Media waxay Shacabka Soomaaliyeed la qeybsanaysaa xusida maalintan qiimahaleh iyo Taariikhdan u baahan in la xuso had iyo goor.

**Keynya oo ka war wareegeyso Dacwadii Xuduud-Badeedka ee kale dhaxeeysay Soomaaliya**

Sida la wada ogyahay Soomaaliya waxay u gudbisatay Maxkamadda Caalimga ee ku shaqada leh dacwad xuduudeedka kale dhaxeeya dowlada Kenya, markii ay cadaadatay in wadahalkii dhex maray labada dhinaca uu noqday mid aan miro dhal ahayn, Maxkamadu waxay u gudbisay Keynya Nuqulkii dacwada si ay uga jawaabto.

Hase yeeshee Xeer Ilaaliyihii dowlada Keynya waxa uu sheegay 07/10/2015, in Soomaaliya aysan gar u lahayn gudbinta dacwada ay aheyd in wax kasta lagu dhameeyo wada hadal. Taasoo runtii |Keynya ay ku dooneyso in Soomaaliya ay ka soo celiso dacwadii Maxkamada, sidaasna qadayadii badda ay si toos ku dhunto. Nasiib wanaag dowladda Soomaaiya way la socotay mar hore waxa ay damacsan tahay dowlada Kenya, sidaas awgeed waxay soo saartay 10/10/2015, go'aan taariikhi ah oo lagu cadeeyay in Soomaaliya ka tanasuleyn Dacwadeeda taasoo runtii muujinaysa Ildheeri siyaasadeed iyo wadaninimo qoto dheer. Dowladda Kenya iyo Soomaaliya waa deris mid mideeda kale ka guureyso ma jirto, xuduuda badduna ee labad dowladood waxay aheyd mid aan qeylo iyo dhibaato aysan ka jirin, laga soo bilaabo 1924kii ilaa 2005; dabadeed ayaa Kenya isku dayday inay badasho xuduudii

iyadoo jeexatay xariijin ay u soo qaloocisay dhinaca Soomaaliya, dhul badeed baddanna ay ku doonayso in ay Soomaaliya ka qaado. Runtii waxaa ku wanaagsan laba dal inay noqdaan saaxibo iskaashada, is ixtiraama is nabad geliya, waana siyaasada dowlada Soomaaliya.

**Madaxweynaha Jamhuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa maanta hortiisa lagu dhaariyey Taliyaha Cusub ee Ciidammada Xoogga Dalka Soomaaliyeed S/Gaas Maxamed Aadan Axmed iyo Abaanduulaha Cusub ee Ciidammada Xoogga Dalka, S/Guuto Cali Baashi Maxamed Xaaji Cumar.**

September 24, 2015

Xafladda dhaarta oo ka dhacdey xarunta Madaxtooyada, ayaa Madaxweynaha hadal uu ka jeediyay waxaa uu kula dardaarmey madaxda cusub ee ciidammada inay meesha ka sii wadaan guulaha iyo horumarka uu ciidanka sameeyay muddadii ay xilka hayeen madaxdii ka horeysey.

“Ciidammada Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxay ku talaabsadeen horumar la taaban karo, dowladduna muhimad gaar ah ayay siineysa inay daboosho baahida ciidanka. Cadowga nabad diidka ah waxaa la gaarsiiyey jab xooggan, taana waxaa abaalkeeda leh ciidammada Xoogga Dalka oo garabsanaya AMISOM. Waxaan idin kula dardaarmayaa inaad ka faa’ideysataan horumarka ay sameeyeen taliyeyaasha idinka horeeyay, isla markaana aad ka shaqeysaan tayeynta ciidanka iyo inaad waddanka u horseeddaan inuu nabad buuxda gaaro’’, ayu yiri Madaxweynaha.

Xafladda dhaarta ayaa waxaa goob joog ka ahaa Ra’iisul Wasaaraha Xukuumadda, Mudane Cumar Cabdirashiid Sharma’arke, xubno ka tirsan golaha wasiirrada iyo mas’uuliyiin kale.

**Khudbadii uu kasoo jeediyey Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay (General Assembly) Raysalwasaaraha Soomaaliya Cumar Cabdirashadii Cali Sharmarke. October 2, 2015**

Raysalwasaaraha Soomaaliya ayaa khudbadiisa ku bilaabay kaalintii Soomaaliya kasoo qaadatay dhismihii Qaramada Midoobay.

Wuxuu Raysalwasaaraha warbixin uu ka bixiyey xaalada Soomaaliya iyo dhibaatooyinka dalka soomaray 25kii sano ee lasoo dhaafay, isagoo ku tilmaamay burburkii dowladii Soomaaliya mid lamid ah kacdoonka xiligan ka socda dalalka Carabta, isagoo sheegay inuu ka xunyahay dhibaatooyinka hada ka taagan qaar kamid ah dalalka Carabta. Wuxuu sheegay in horumarka uu ku xiran yahay joojinta dagaalka.

Raysalwasaare Cumar ayaa sheegay in wax badan ay Soomaalida kasoo barteen burburkii dowladooda, wuxuuna xusay inkastoo burbur dowladeed ka dhacay dalka Soomaaliya hadana Soomaalida ay ku guuleysteen inay wax badan ka qabtaan Dhaqaalahooda, ganacsiga, Waxbarashada iyo horumarinta sida isgaarsiinta.

Cumar ayaa sheegay in dalka Soomaaliya uu leeyahay mustaqbal wanaagsan marka loo eego nimcada uu Illaahay dalkooda siiyey, isagoo sheegay in dib u dhiska uu wakhti qaadanayo ina baahan yahay dulqaad fiican.

Caqabadaha hada hortaagan ayuu Raysalwasaaraha sheegay inay ay kamid tahay sidii doorasho loo qaban lahaa 2016, wuxuuna sheegay in dowlada Federaalka ay ku guuleysatay dhismaha sadex maamul gobaleed.

Doorashada ka dhaceysa dalka Soomaaliya 2016 ayuu sheegay Raysalwasaaraha inay muhiim tahay inay noqoto mid loo dhan yahay oo ay taageeraan shacabka Soomaaliyeed, isagoo taariikh ahaan usoo qaatay in Soomaaliya uu ahaa dalkii ugu horeeyey ee Afrika oo xor ah oo Madaxweyne xilka haya doorasho looga guuleystay, taasina ay muujineyso in Soomaalida ay awood u leeyihiin inay qabtaan doorashooyin madax banaan.

Ciidamada Qaranka

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee hada heysta dalka Soomaaliya ayuu sheegay Raysalwasaaraha inay kamid tahay ciidamada Qaranka Soomaaliya oo aan si

wanaagsan loo qalabeyn, taasina ay caqabad ku tahay wadanka Soomaaliya siduu u hanan lahaa sugida Amniga.

"…Maaha wax la qaadan karo in askarta Soomaaliyeed oo aan heysan qalab iyo taageero ku filan in laga codsado inay naftooda u huraan hawlgalada lagu sugayo amniga…" ayuu yiri Raysalwasaare oo ka codsaday caalamka in laga taageero dhismaha ciidamo Qaran.

Ciidamada AMISOM ayuu sheegay inay kaalin fiican ka geysteen la dagaalanka Al Shabaab iyo xoreynta magaalooyin badan, balse ay laga maar maan ay tahay in la helo Ciidamo Qaran oo looga gudbo ciidamada Afrika ee dalka ku sugan.

Dhaqaalaha.

Raysalwasaare Cumar ayaa sheegay in dalka Soomaaliya u baahan yahay Mashruuc balaaran oo dib u dhis ah sida Marshal Plankii dib loogu dhisay qaarada Yurub xiligii uu dhamaaday dagaalka labaad ee Adduunka.

"…Soomaaliya uma baahna deeq joogto ah balse waxay dooneysaa dib u dhis iyo maalgashi dib loogu soo kiciyo ganacsiga iyo dhaqaalaha dalka…" ayuu yiri Raysalwasaare Cumar.

Cumar ayaa khudbadiisa kusoo gabagabeeyey in Soomaaliya wax badan kasoo gudubtay oo dhibaato ah, isla markaana ummada Soomaaliyeed ay xiligan diyaar u yihiin inay dib ugu soo noqdaan masraxa caalamka.

# **Ciidamada Badda Puntland oo gacanta ku dhigay Doonyo kalluumaysi sharci daro ah ka waday Xeebaha Puntland**

October 17

Ciidanka badda ee Maamulka Puntland ayaa maanta soo bandhigay doonyo ay ku soo qabqabteen hawlgallo ay dhawaan sameeyeen xeebaha Puntland.

Doomahan la soo bandhigay oo gaarayay illaa lix doon ayaa waxaa la sheegay in ay si sharci darro ah uga kalluumeysanayeen xeebaha Soomaaliya.

Taliyaha ciidamada Badda ee Maamulka Puntland Admiral Cabdirisaaq Diiriye Faarax ayaa sheegay in saddex ka mid ah doomahan laga leeyahay dalka **Iiraan** halka saddexda kalana laga leeyahay wadanka **Yemen**.

Shaqaalaha saarnaa doomahan ayaa waxaa ay gaarayeen illaa iyo 130 shaqaale oo u badan ajaanib hase ahaatee waxaa ku jira dhowr ruux oo Soomaali ah kuwaasoo illaalo u ahaa qaar ka mid ah doomaha sida sharci darrada ah uga kalluumeysanayey xeebaha Soomaaliya.

Kalluumeysatada ajaaniibta ah ayaa lagu wadaa in la soo taago maxkamad iyadoo laga yaabo in ay mudan karaan xukuno xabsi iyo ganaax isugu jira.

Ma aha markii ugu horeysay ee maamulka Puntland uu soo qabto kalluumeysato ajaaniib ah oo ka kalluumeysanaya xeebaha Soomaaliya.

Iiraan iyo Yaman ayaa safka hore uga jira Kalluumeysiga sharci darrada ah ee xeebaha Soomaaliya ka jira.





# War uu soo saaray C/raxmaan C/shakuur

Abdirahman Abdishakur Warsame

October 16 at 10:36pm



Maalmahan waxaa baraha warbaahinta Bulshada la isla dhexmarayey hadal aan sanadkii 2009 ka iri goob fagaara ah, taasoo la xariirta heshiis is af garad (memorandum of understanding, not agreement) ah oo aan magaca Xukuumadii KMG ahayd ku saxiixay ka dib markii Golaha Wasiirada ii wakiishay. Waxaan rabaa in aan cadeeyo sidii aan dhowr jeer oo hore u cadeeyey.

1- In go'aanka aan ku saxiixay is fahamka uu ahaa go'aan Gole Wasiiro iyo Madaxweyne. Masuuliyadiisuna ay ahayd mid wadareed, waxaa na arrinka Golaha oo aan xiligaa ka maqnaa geeyey wasiirka Kaluumaysiga iyo Khayraad Badda Prof Ibi. Kaalintaydu waxay ku koobneed oo keli ah Saxiix la ii wakiishay bedelka Wasiirkii Arrimaha Debedda oo hawl qaran Roma ugu maqnaa, maadaama uu isagu heshiisyada caalamiga ah saxiixo, Wasiirka Iskaashiga Caalamiga oo aan markaa xilkiisa hayey na uu ahaa ka ugu dhow.

*(Warkaan ayaa waxaa uu ku qoray bartiisa uu ku leeyahay facebook ga) October 16 at 10:36pm.*

2- Waxaa ka tala bixiyey Khubaro Soomaali iyo Qaramadda Midoobay ah.

3- Kenya iyadaa nagu qabsatay Badeena waxay na qabsigaas bilawday sanadkii 2005. Waxa aan kala saxiixanayna waxay ahaayeen Is faham (understand) sida ay tahay in muranka lagu xaliyo ee ma aanan la gelin Heshiis (agreement) muranka lagu xalinayo.

4- Waxaan isku afgaranay in aan ka wada hadalno muranka oo aan Qaramada Midoobay talo waydiino, hadii la isku fahmi waayana shuruucda caalamiga ah lagu kala back.

5- Dawlada Soomaaliyeed ee haatan jirtaa markii ay Kenya wadahadal uga taagwaysay ayey dacwada ka gudbisay. Kenya waxay haatan ku doodaysaa aan wadahadalno sida uu qabo is afgaradkii 2009, halka ay dawlada Soomaaliya leedahay wadahadal kii Kenya ayuu ka socon waayey.

Waxaan fariintan u soo gudbiyey waa in aan la isku danbaabin oo ruuxii doonayo dhabta iyo xaqiiqada si uu wax fahmo ay u cadaato sida ay wax u dhaceen.

## Wareegga Dhulka & Gacankiisa

Muddo fog ayey culumada falakiga rumeysnaayeen in dhulku uu yahay KUBAD; TAALIS filosoofkii iyo madaxii dugsigii Malatiya ee Giriigga wuxuu sheegay in dhulku yahay Kubbad, waa Qarnigii 6aad C.H. Hase yeeshee ma suurtagalin muddo dheer in la helo wareegga dhulka, waayo waxaa la heli kari waayey GACANKA DHULKA (RADIUS); taasoo keentay in la maro wadda kale oo lagu helo wareeggaas. ARITOSTIN caalimkii ALEXANDARIYA (Masar) ee Qarnigii 3aad C.H. ayaa helay fikrad lagu soo saari karo wareegga dhulka ayadoon la aqoon GACANKA.

Waxayna noqotay inuu qiyaaso xajasha qallooca fallaaraha Qarraxda ee ALEXANDARIYA, marka Qarraxdu ay isku soo taagto magaalada Aswaan oo ka fog ALEXANDARYIA 800km; qallooca fallaaraha Qorraxdu wuxuu ahaa maalintaas $7.2^o$ sidaas awgeed wareegga dhulku wuxuu noqday (X) oo laga keeni karo Formulahaan: $7.2^o/360^o=800/x$.

Hadaba: = $78^o/360x800= 50x800=$ 40,000km

Sidaas awgeed GACANKIINA wuxuu noqday:

$$R = \frac{X}{2\pi} = \frac{40,000}{2.31416} = 6366K4$$

Waxaase la yaab leh in dad badan oo qaarkood sheeganaayo inuu yahay aqoonyahan uu weli ka shakisan yahay Kubad nimada dhulka.

Waxaysa ogeyn in Qarnigii 9aad C.D. Culimadii Muslimka ay qiyaaseen wareegga dhulka, waxayna keeneen isla Natiijadii ARITOSTIN. Waana tan ilaa maanta la isku wada raacsan yahay lana hubiyey cilmi ahaan 4Qarni hadda ka hor.

## Shiikh (Bari Cun)

Waxaa jiray sheikh dadka daaweyn jiray shiikhaasoo qofkii u tagaaba hadii uu ka sheeganaayo sixir ama xanuun dhaawac iyo faqriba wuxuu fari jiray in uu bari cuno waana lagu moodi jiray.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa shiikhii waxaa u yimid nin Dameer ka lumay oo mudo la'aa ninkii baadidii ayuu shiikhii u bandhigay, shiikhii waxa uu faray in uu Bari cuno, dadkii oo dhan ayaa shiikhii la yaabay ninkii baridii ayuu cunay calooshii ayaa kacday meesha waa baadiyee habeenkii oo dhan ayuu banaanka u laalaabtaa, saqda dambe habeenkii jawiga degan yahay ayaa asagoo fadhiya maqlay Ciydii dameyrkiisii uu yaqaano ninkii kor ayuu u booday ciydii ayuu raacay dameerkii oo aqal ku dhex xerin ayuu u tegay ninkii dameerkiisii ayuu soo furtay isla subaxdiina shiikhii ayu horkeenay, mar labaad ayaa shiikhi dadkii oo dhan la yaabeen.

**LABA NIN OO BAQIIL AH**:

Bari baa waxaa daris ahaa labo nin oo bakhaylo ah, mid ka mid ah ayaa wuxuu yiri, caawa waan soo daahayaa ee albaabka iga fur saxiibow, waa yahay ayuu ku yiri hase yeeshee sideen ku gartaa inaad adigu igu soo garaacday?.

Wuxuu yiri daaqadda ayaan dhagax yar kaaga soo tuurayaa, ee sideen ku gartaa inaad adigu I maqashay?

Wuxuu ugu jawaabay aniguna waxaan kuusoo tuurayaa shillin markaad maqasho dhawaaqiisa albaabka waa furan yahay ee la soco, waa yahay ayuu ugu jawaabay.

Ninkii ayaa wuxuu yimid saqdii dhexe habeenkii sidii balantu ahayd dhagax yar ayuu hore usoo qaatay oo ku tuuray, ninki waa maqlay isagana shillinkii ayuu soo tuuray, kadib sida balantu ahayd albaabkii wuu furay wuuna iska iska seexday maadaama uu balantii oofiyay.

Subixii markii uusoo kacay oo uu albaabka kasoo baxay ayuu wuxuu arkay ninkii oo daaqadda taagan wuxuuna ku yiri war maxaa ku helay? Wuxuu ugu jawaabay ilaa iyo hadda waxaan baadigoobayaa Shillinkii markaasuu intuu qoslay wuxuu ku yiri Shillinka xarig baa iigu xirnaa markaan kuusoo tuuray oo shanqartiisa maqashay waan soo ceshaday hhhh.

**OGEYSIIS OGEYSIIS OGEYSIIS**



# AKADEMIYADA CULUUMTA BADDA & QAWAANIINTA CAALAMIGA EE KHALIIF MACOW XASAN

## WARGELIN WACAN

Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed

Waxay abuurtay Akademiyadda Khaliif Macow Xasan oo dowladda leedahay waana Jaamacad leh laba Kulliyadod:

1) Culuumta Badda 2) Qawaaniinta Dowliga.

Cidii dooneysa oo heysata shahaadada dugsiga sare codsi ayey u soo qoran kartaa, ama si toos ah ayey isaga diiwaan gelin kartaa.

Imtixaanka tijaabadu waa 15/11/2015. Xaruunta AKADEMIYADU waxay ku taal Deg. Cabdicasiis, ka soo horjeedka dugsigii hore ee badda kuna dhow xeebta, dhinacna ku heysa Makhaayadda Muqdisho ee GYMka, daraasaddu waxay billaabaneysaa 1/12/2015 INSHAA'ALLAAH.

**Kala soo xiriir Tel: 0615152000/0615522680/0617337737**

F.G: AKADEMIYADA WAA LACAG LA'AAN

***HA MOOGAAN INAAD ISKA DIIWAAN GELISO ARDAYDA LA QAADANAYO WAA XADIDAN YIHIIN EE YAAN LAGAA BUUXIN***